Soomaaliya

Maareynta Khatarta ee Ururrada aan Dawliga Ahayn (NGO-yada)

Qeybta Maareynta Khatarta

Qaramada Midoobay Soomaaliya

Tusmo

1 ERAY-BIXIN 4

2 SIDA LOO ISTICMAALO DUKUMIINTIGAN 6

3 GUUDMAR 7

3.1 Dowladaha Taagta Daran, Hubaal la'aanta iyo Khatarta 7
3.2 Dukumintigan yaa loogu talogalay? 7
3.3 Waa maxay khatar? 7
3.4 Waa maxay maareynta khatar? 7
3.5 Waa maxay sababta aad ugu baahan tahay in aad khatarta maareyso? 8
3.5.1 Shuruudaha Urureed iyo Kuwa Dowladeed 8
3.5.2 Faa'iidooyinka Maareynta Khatarta 8
3.6 Noocyada Khatarta 9
3.7 Isku Biimeyn Khatar 9
3.8 Aasaaska Hannaanka Maareynta Khatarta 10

4 MABAADII'DA MAAREYNTA KHATARTA 11

4.1 Guudmar 11
4.2 Waxa ay Abuureysaa oo ay Ilaalineysaa Qiyamka 11
4.3 Qaybta Asaasiga ah ee Hannaanka 11
4.4 Qaybta Go'aan Qaadashada 12
4.5 Waxa ay la Tacaashaa Hubaal La'aanta 12
4.6 Waa ay Nidaamsan Tahay, Qaabeysan Tahay oo ay Waqtiyeysan Tahay 12
4.7 Waxa ay ku Saleysan Tahay Macluumaadka ugu Fiican ee la Heli Karo 12
4.8 Waxa ay Waafaqsan Tahay Ururka 12
4.9 Waxa ay Xisaabta ku Dareysaa Qodobbada Dadka iyo Dhaqanka 12
4.10 Hufanaan Loo Dhanyahay 12
4.11 Nidaam Firfircoon, Lagu Celceliyay Jawaab Degdeg ahna Bixin Kara 12
4.12 Waxa ay Fududeyneysaa Horumarin Joogta Ah 12

5 ABUURIDDA HEYKALKA MAAREYNTA KHATARTA 13

5.1 Guudmar ku Saabsan Heykalka Maareynta Khatarta 13
5.2 Abuuridda Heykalka Maareynta Khatarta 13
5.3 Fiiro Gaar ah u Lahow Mabaadii'da Maareynta Khatarta 14
5.4 Fahan Urukaaga iyo Xaaladdiisa 14
5.5 Siyaasadda Maareynta Khatarta 14
5.6 Naqshad 15
5.6.1 Abuur Isla-xisaabtan 15
5.6.2 Maareynta khatarta ku dhaf hannaannada ururkaaga, dhaqankiisa iyo qiyamkiisa 16
5.6.3 U qoondee dhaqaale iyo waqti kaafi ah 16
5.6.4 Aasaas habab isla-xiriir iyo warbixin-siin gudaha iyo dibadda ah leh 16
5.6.5 Abuur hagid gacan siisa falanqeynta iyo qiimeynta khataraha 16
5.6.5.1 Guudmar 16
5.6.5.2 Aqoonso Qeybaha Khatarta 17
5.6.5.3 Sidee loo cabbiraa 'suurtagalnimada' dhicidda khatar? 18
5.6.5.4 Sidee loo cabbiraa 'cawaaqibta' khatar marka ay dhacdo? 19
5.6.5.5 Sidee loo cabbiraa 'heerka guud' ee khatar? 21
5.6.5.6 Go'aamada Quseeya Kordhinta, Yeelashada iyo La-tacaalidda 23
5.6.5.7 Sidee loo diiwaangeliyaa macluumaadka khatarta? 23

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

5.7 FULIN 26
5.7.1 Qorshaha mashruuca *26*
5.7.2 KaKTaageerada Unugga Maareynta Khatarta (UMK) *27*
5.8 KORMEER IYO DIB-U EEGIS 28
5.8.1 Hordhac Guud *28*
5.8.2 Aasaas Habab Kormeerid *28*
5.8.3 Aasaas Habab Guudmar iyo Warbixin-siin *28*
5.9 HORUMARIN JOOGTA AH 29
5.9.1 Guudmar *29*
5.9.2 Kormeer iyo Dib-u eegis *29*
5.9.3 Hirgelinta Hannaanka Maareynta Khatarta *29*
6 HANNAANKA MAAREYNTA KHATARTA 30
6.1 GUUDMAR KU SAABSAN HANNAANKA MAAREYNTA KHATARTA 30
6.2 AASAASIDDA XAALADDA 31
6.2.1 Guudmar *31*
6.2.2 Xaqiiji Ujeeddooyinka Ururka *31*
6.2.3 Aqoonso Dhinacyada Daneeya Ururkaaga *32*
6.3 AQOONSASHADA KHATARTA 33
6.3.1 Guudmar *33*
6.3.2 Aqoonso khataraha *33*
6.3.3 Sida Loo Aqoonsado Khataraha *35*
6.3.4 Sida Loo Tilmaamo Khataraha ('Oraahyada Khatarta') *36*
6.3.5 Aqoonso Tallaabooyinka Maareynta Khatarta ee Jira *36*
6.4 FALANQEYNTA KHATARTA 37
6.4.1 Qiimee Suurtagalnimada iyo Cawaaqibta *38*
6.4.2 Xaddid heerka guud ee khatarta *39*
6.4.3 Abuur Gal Khatar *40*
6.4.4 Magacaw Maareeye Khatar *40*
6.5 QIIMEYNTA KHATARTA 41
6.5.1 Guudmar *41*
6.5.2 Qiimee Khataraha *42*
6.5.3 Kordhi ama Heyso Khataraha *43*
6.6 LA-TACAALIDDA KHATARTA 43
6.6.1 Guudmar *43*
6.6.2 Aqoonso Khiyaaraadka La Tacaalidda Khatarta *44*
6.6.3 Dooro Ikhtiyaarka (Ikhtiyaarada) Ugu Haboon ee La-tacaalidda Khatarta *44*
6.6.4 Abuur Qorshooyin Lagula Tacaalo Khatarta *45*
6.6.5 Fuli oo Guudmar ku Samee La-tacaalidda Khatarta *46*
6.7 XIRIIR IYO WADATASHI (HANNAAN JOOGTA AH) 47
6.7.1 Hordhac Guud *47*
6.7.2 Qofta ay Tahay in La Wargeliyo/Lala Tashado *47*
6.7.3 Wada-Xiriir *48*
6.7.4 Wadatashi *48*
6.8 KORMEER IYO DIB-U EEGID (HANNAAN JOOGTA AH) 49
6.8.1 Hordhac Guud *49*
6.8.2 Aasaas Habab Kormeer *49*
6.8.3 Aasaas Habab Warbixin-siin iyo Guudmar *49*

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

1 Eray-bixin

Halkan waxa ku qoran erey-bixinno takhasuseed, iyoadeegsiga takhasuseed ee ereyo guud, oo aad kula kulmi doonto dukumiintigan:

Heerka Khatarta ee La Aqbali karo	Heerka khatarta ee la aqbali karo wuxuu ka soo muuqanayaa go'aanka maamulka ururka si uu u aqbalo khatarta (suurtagalnimada iyo cawaaqibta khatarta). Arrintan waxaa kale oo loo yaqaannaa isku biimeynta ururka ee khatarta.
Xiriir iyo Wadatashi	Waa hannaan joogta ah oo soo noqnoqda kaas oo ururku sammeynayo si uu u bixiyo, u wadaago ama u helo macluumaad, iyo si uu dhinacyada daneynaya ururka ula galo wadaxaajood quseeya maareynta khatarta.
Cawaaqib	Waa natiijada dhacdo taas oo saameyneysa ujeeddooyinka.
Xakameyn/Kontarool	Waa cabbir ama halbeeg beddelaya (badanaa, yareynaya) khatar.
Suurtagalnimo	Waa suurtagalnimada ay wax ku dhici karaan.
Haraaga Heerka Khatarta	Waa khatarta wali taagan ka dib markii lala tacaalay.
Khatar	Saameynta hubaal la'aantu ay ku leedahay walxaha.
Isku Biimeyn Khatar	Qaddarka iyo nooca halista oo uu urur rabo in uu haysto ama xajisto.
Qiimeynta Khatar	Waa hannaanka guud ee aqoonsashada khatar, falanqeynta khatar iyo qiimeynta khatar.
Heerka Khatar	Qiimeynta khatar la xisaabiyay iyada oo la adeegsanayo cabbirka suurtagalnimada iyo cawaaqibta iyada oo la tixgelinayo kormeerka ama xakameynta deegaanka ee taagan.
Maareyn Khatar	Waa hawlo abaabulan ee uu ururka qabto si uu u xakameeyo ama u yareeyo khatary.
Heykalka Maareynta Khatarta	Tani waxay si ballaaran sharraxaad uga bixineysaa sida maareynta khatartu ay ugu dhafan tahay oo ay u waafaqsan tahay siyaasadaha, hababka, shaqooyinka iyo qiyamka ururka.
Siyaasadda Maareynta Khatarta	Waa bayaanka rasmiga ah ee ururka oo ku aaddan ujeeddooyinkiisa guud iyo jihada ee maareynta khatarta.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Hannaanka Maareynta Khatarta	Waa dhaqangelinta qaabeysan ee siyaasadaha maamulka, hababka, qabashada shaqooyinka xiriirka, talobixinta, aasaasidda xaaladda, iyo aqoonsashada, lafaggurka, qiimeynta, la tacaalidda, kormeeridda iyo dib-u-eegista khatar.
Shaxda Khatarta	Waa qalab lagu abla'ableeyo oo lagu soo bandhigo khatarta iyadoo la aqoonsanayo baaxadaha cawaaqibta iyo suurtagalnimada.
Khatar Maareeye	Waa qof ama sharkad leh awood ama oggolaansho lagu maareynayo khatar.
Diiwaan Khatar	Waa diiwaan khataraha la aqoonsaday iyo sida loo maareeyay.
Khatar Yeelasho	Oggolaanshaha faa'iido, ama culeys la fili karo ee khatar gaar ah leedahay.
Khatar U-dulqaadasho	Diyaargarowga ururro ama dhinacyada daneeya ay ku xammili karaan khatarta ka dib marka lala tacaalo si ujeeddooyinka ururka loo sii xaqiijiyo.
La Tacaalid Khatar	Hannaanka doorashada iyo fulinta cabbirro ama 'fursado wax la tacaalid' oo lagu beddelo khataro ama cawaaqibteeda la fili karo.
Daneeyaha	Waa qof ama urur saameyn kara, saameyn ku yeelan karaan, ama isu arka in ay saameynayaan, go'aan ama shaqo iyaga.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

2 Sida Loo Isticmaalo Dukumiintigan

Qeybta 1aad Waxaa ku qoran ereybixinno takhasuseed iyo adeegsiga takhasuseed ee ereyo guud, oo aad kula kulmi doonto dukumiintigan (warqaddan).

Qeybta 2aad Waxay ku siineysaa majaraha (khariiddada) dukumiintiga iyo sida aad ugu hirgelin lahayd ururkaaga.

Qeybta 3aad Waxay bixineysaa sharaxaad hordhac ah oo ku saabsan khatarta iyo maareynta khatarta iyo sababta ay muhiim u yihiin.

Qeybta 4aad Waxay bixineysaa guudmar ku aaddan mabaad'iida xoojineysa haykalka maareynta khatarta iyo hannaanka maareynta khatarta.

Qeybta 5aad Waxay tilmaameysaa talooyin ku saabsan dhisidda haykalka maareynta khatarta taa oo gacan ka geysan doonta aqoonsashada, qiimeynta iyo maareynta khataro gaar ah. Talooyinkaas waxa ka mid ah:

- fahmidda noocyada kala duwan ee khatarta iyo aragtida urureed ee ku aaddan khatarta;
- fahmidda aasaaska habka maareynta khatarta (mabaad'iida, heykalka, hannaanka); iyo
- abuuridda Diiwaan Khatar (warqad lagu diiwaangeliyo khataraha iyo sida aad u maareyneyso).

Qeybta 6aad Waa faahfaahinta aasaasiga ah ee dukumiintigan waxaana ay tallaabo-tallaabo kuugu sharxaysaa hannaanka maareynta khatarta – sida aqoonsashada, qiimeynta iyo maareynta khataro gaar ah. Qeybtan waxaad u adeegsan kartaa in ay kaa caawiso in aad fahamto oo aad billowdo qaabeynta haykalka khatarta adiga kuu gaarka ah.

Maaddaama ururkasta uu gaar la yahay baaxaddiisa, shaqadiisa, hawlgalkiisa iyo dabeecaddiisa (abuurtiisa), waa in aadan si miyir la'aan ah dukumiintigan qoraalkiisa u wada qaadan oo kan adiga kuu gaarka ah ee siyaasadda qaabka maareynta khatarta ku wada minguurin. Wixii halkan aad ka hesho oo kaa anfaca, waa inaad waafajisaa baahiyaha gaarka ah ee ururkaaga U adeegso warqaddan sida ugu habboon oo ay danaha ururkaaga ugu adeegi karto, halkii aad sideeda u wada qaadan lahayd.

Ogow: dukumiintigan waxaan ku qaadaa dhignay hannaanka maareynta khatarta sida loogu dabbaqi lahaa urur si guud. Balse sidoo kale waxa lagu dabbaqi karaa, tusaale ahaan, mashruuc gaar ah. Mabaad'iida iyo tallaabooyinka waa isla mid, keliya waxa kala duwan baaxadda meesha loo adeegsanayo.

Dukumiintigan waxaa loo sameeyay si waafaqsan ISO31000. ISO31000 waxaa la faafiyay Nofeembar 2009, wuxuuna tilmaan ka bixinayaa jaangoynta ku aaddan fulinta maareynta khatarta. Ujeeddada ISO31000:2009 waa in uu ahaadaa dukumiinti ay adeegsan karaan laguna dabbaqi karo hay'ad kasta ee dowladeed, tu gaar loo leeyahay, tu bulsheed, urur, koox ama qof.[1] Jaangoyntan waxa loogu talogalay hagid ee ujeeddadu ma aha in loo hoggaansamo. Nuqul jaangoyntan ah waxa laga heli karaa bogga Ururka Caalamiga ee Jaangoynta oo ah www.iso.org.

[1]Isha xigashada: ISO 31000 catalogue http://www.iso.org/iso/catalogue_detail.htm?csnumber=43170

3 Guudmar

3.1 Dowladaha Taagta Daran, Hubaal la'aanta iyo Khatarta

Dowladaha taagta daran sida Soomaaliya[2] caadi ahaantoodaba waxay ku lug lahaadaan heer aad u sarreeya oo hubaal la'aan ku saabsan:

- Siyaasadda iyo nabadgelyada deegaanka;
- Deegaan sharciyeedka;
- Awoodda iyo daacadnimada qeybiyaha/wadaagaha;
- Xaaladaha deegaanka; iyo
- Sida bulshada loo gaari karo.

Marka hubaal la'aanadan gaarka ah lagu daro ee horay uga jiray xaaladaha deggan, ururradu waxay wajahaan caqabad ay aad u adag tahay in lagu shaqeeyo. Maareyn khatar oo wax ku ool ah ayaa looga gudbi karaa caqabaddan.

3.2 Dukumintigan yaa loogu talogalay?

Dukumiintigan waxaa loogu talogalay dhammaan shaqaalaha ururrada aan dowliga ahayn kuwaa oo doonaya in ay si wax ku ool ah ay u maareeyaan khatarahooda si wanaagsanna ay Soomaaliya uga dhex shaqeeyaan – agaasimayaasha fulinta, maamulayaasha, shaqaalaha sarsare iyo shaqaale kasta oo kale oo dukumiintigu khuseyn kara. Dukumiintigu wuxuu ku siinayaa hab tallaabo tallaabo ah oo gacan kaa siinaya sidii aad u qaabeyn lahayd heykalka maareynta khatarta/u aqoonsan lahayd, u qiimeyn lahayd, u kormeeri lahayd iyo sidii aad khatarta ururkaaga u maareyn lahayd.

3.3 Waa maxay khatar?

Waa wax caadi ah in khatarta loo maleeyo in ay tahay waxa ururka dhexdiisa ka khaldama. Balse qeexid kooban ayaa ah 'khatartu waa saameynta hubaal la'aantu ku leedahay ujeeddooyinka ururka'. Khataraha la fili karo waa ay yimaadaan waana laga gudbaa, ama way horumaraan, marka firfircoonida gudaha ee ururku is beddesho, iyo marka deegaanka dibadda ee uu ururku ku shaqeeyo isbeddelo. Si loola socdo khataraha saameyn kara ururkaaga waa in shaqa joogta ah ay jirtaa.

3.4 Waa maxay maareynta khatar?

Ujeeddada koowaad ee maareynta khatartu waa saadaalinta khataraha. Ujeeddada kale waa in laga hortagaa dhicitaanka khataraha ama la yareeyaa saameyntooda haddii ay dhacaan.

Maareynta Khatar	Waa hannaanka sammeynta shaqooyin abaabulan si loo xakameeyo ama loo yareeyo khatar.

Maaddaama ka jawaabidda khatartu ay tahay in ururka laga gacan siiyo sidii uu ujeeddooyinkiisa u fulin lahaa, maareynta khatartu waa in ay qayb aasaasi ah ka noqotaa dhammaan dhinacyada

[2] Isha Xigashada: Fund For Peace 'Fragile States Index 2015 - Somalia received the second highest fragility score in 2015 at 114.0 not far behind South Sudan at 114.5

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

ururka oo ay ku jiraan qeybaha qorsheynta istiraatiijiyeed, go'aan qaadashada, qorsha-hawleedka iyo qoondeynta kheyraadka.

Maaraynta khatartu waxay ka kooban tahay saddex qodob oo muhiim ah: mabaadii'da maareynta khatarta, heykalka maareynta khatarta (oo ay siyaasaddu ka mid tahay), iyo hannaanka maareynta khatarta – dhammaantood waxaa lagu faahfaahiyay Qeybta 4aad, 5aad iyo 6aad ee dukumiintigan.

Ugu danbeyntii, khatartu waxay ka jirtaa heerar kasta oo shaqooyin ah. Waxaa jira khataro saameyn kara ururka si guud sida khataraha dhaawici kara sumcadda ururka. Waxaa jira khatara saameyn kara caafimaadka iyo nabadgelyada shaqaalaha, howlaha dhaqaalaha la xiriira, howlaha bixinta adeegga, ama khataro saameyn ku yeelanaya wax ka badan hal shaqo. Waxaa kale oo jira khataro gaar u ah mashruuc kasta. Taa macnaheedu waxa weeye in qof kasta oo ururka ka tirsan uu qaadayo qeyb ka mid ah mas'uuliyadda maareynta khatarta

3.5 Waa maxay sababta aad ugu baahan tahay in aad khatarta maareyso?

Maareynta khatartu waa hawl wanaagsan. Maareynta khatartu waxay ururka ka caawinaysaa in ururku uu si fiican uga faa'iideysto kheyraadkiisa, kor u qaado waxqabadkiisa uuna u yareeyo waxyeellada shaqaalaha iyo dhinacyada isaga ka faa'iideysta soo gaari karta.

3.5.1 Shuruudaha Urureed iyo Kuwa Dowladeed

Maareynta khatartu waxay lagama maarmaan u tahay dowlad wanaagga iyo sidoo kale hoggaansanaanta. Ururkaagu hadduu si wanaagsan u maareeyo khatarta soo wajaheysa, wuxuu ka taxaddari karaa go'aan qaadashada xun, is-cajabin iyo cawaaqib waxyeelleyn kara shaqooyinka ururka, sidoo kale maareynta khatartu waxay ku gacan siineysaa ururku in uu ujeeddooyinkiisa xaqiijiyo si uu adeeggiisa u gaarsiiyo macaamiishiisa.

Intaa waxaa dheer in mabaadii'da dowlad wanaaggu ay qolyaha maamula ururka ay farayso in ay waajib ku tahay in ay ilaaliyaan danaha dhinacyada daneeya ururka. Qaar badan oo ka mid ah dhinacyada daneeya ururka ayaa waxay filayaan in NGO-yadu ay u maareeyaan khataraha si waafaqsan mabaadii'da iyo shaqooyinka dowlad wanaagga.

Sababahaas aawadood, siyaasadda maareynta khatarta, hannaannada iyo shaqooyinka waxay u baahan yihiin in la waafajiyo siyaasadaha, hannaannada iyo shaqooyinka kale ee ururka si Guddiga Maamulka Dhexe, ujeeddada iyo aragtida ururka gacan loo siiyo. Is waafajinta siyaasadaha maareynta khatarta iyo siyaasadaha ururka iyo hannaannadiisa kale waxay sidoo kale gacan ka geysaneysaa fulinta dowlad wanaagga.

3.5.2 Faa'iidooyinka Maareynta Khatarta

Iyadoo ay gacan ka geysaneyso dowlad wanaagga iyo hoggaansanaanta, maareyn khatar oo wax ku ool ah waxay kaloo gacan ka geysan kartaa qoysheynta shaqeed iyo tan istiraatiijiyeed iyo hawlgelinta guud ee ururka. Maaraynta khatartu waxay abuureysaa kalsooni ah in ururkaagu uu soo saari karo natiijooyinka loo baahan yahay, in uu ula tacaali karo khataraha heer la aqbali karo, iyo in uu go'aanno xog ku dhisan ka qaato fursadaha.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Faa'iidooyinka qaar ee maareynta khatarta waa kuwa gacan ka geysta:

- hoos u dhigidda suurtagalnimada kharashka badan ee yaabka leh ee laga yaabo;
- diyaarinta dhacdooyin xoog leh iyo kor u qaadidda adkeysiga guud;
- kor u qaadidda tayada go'aan qaadashada heer kasta;
- suurogelinta fulinta go'aanno wax ku ool ah;
- horumarinta hannaanka go'aan qaadashada;
- mudnaan siinta kheyraadka;
- kor u qaadidda waxqabadka;
- aasaasidda ujeeddo iyo doorar cad, iyo dhamaan la xisaabtanka shaqaalaha; iyo
- kor u qaadidda kalsoonida dhinacyada daneeya ay ku qabaan ururka.

3.6 Noocyada Khatarta

Soomaaliya waxaa weligeed loo heysta in ay tahay deegaan khatar badan u leh ururrada aan dowliga ahayn, khatarahaasina waxaa loo qeexay in ay yihiin kuwo dhanka nabadgelyada la xiriira. Muddo sannado ah, waqti iyo dhaqaale cayiman ayaa la kharash gareeyay iyadoo la isku dayayo in la yareeyo khatarta ku soo wajihi karta shaqaalaha iyo mashaariicda[3]. Dhawaanahan, warbixinno uu heerkoodu sarreeyo oo ku saabsan wax is-dabamarin iyo marin habaabinta mashaariicda gargaarka Soomaaliya ayaa waxay sababeen in khataraha dhaqaalaha iyo kuwa mashaariicda iyo hey'adaha ay ka mid noqdaan arrimaha khatarta diiradda lagu saaro. Si guud, marka Soomaaliya la joogo khatar waxaa loo qeybiyaa saddex nooc oo balballaaran haddana isla xiriira:

1. Khatar Xaaladeed: waa khataraha bannaanka ee ka baxsan xakamaynta ama awoodda NGO-yada (sida musuubooyinka dabiiciga, falalka argagixiso, xasilloonidarrida siyaasadeed, maqnaanshaha kaabayaasha dhaqaale ee dowladeed).

2. Khatar Mashruuceed: waa khataraha la xiriira sida mashruuc ama barnaamij loo naqshadeeyo oo loo fuliyo, taas oo ay ka dhalan karto in la dabooli waayo baahyaha ka faa'iideysayaasha iyo/ama waxyeello dhici karta (sida mashruuca oo la marin habaabiyo, awood la'aan, tayo-xumo ku saabsan bixinta deegga).

3. Khatar Urureed: waa khataraha ururka dhexdiisa ka jira, kuwaas oo saameyn kara ammaanka iyo nabadgelyada shaqaalaha iyo/ama sumcadda ururka (sida nidaamka maamulidda dhaqaalaha, dadka iyo hantida).

3.7 Isku Biimeyn Khatar

Isku biimeyn khatar waa heerka khatar oo uu ururku diyaar u yahay in uu qaato si ku talogal ah. Si guud, waxay u badan tahay in ururku uu isku biimeeyo khataraha heerkoodu yaryahay halka uu qaadan lahaa kuwa heerkoodu sarreeyo. Waxaa jiri kara xaalada khaas ah – yacni khatar heerkeedu sarreeyo taas oo faa'iidada laga heli karo ay damaanad gelineyso 'qaadasha khatarta' – hayeeshee urur kasta waa in uu feejignaan gaar ah u yeeshaa khatarahaasi.

[3]Isha xigashada: Assessment of Implementation of the Somalia NGO Consortium's "Guidelines for Risk Management & Accountability for NGOs operating in Somalia/Somaliland" February 2015

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Tusaale ku saabsan khatar isku biimeynta waxaa noqon kara 'in la bixin kari waayo dhaqaale kaafi ah oo lagu qabto adeeg cusub ee mashruuc, taas oo saameyn ku yeelan karta ujeeddooyinka iyo sumcadda ururka'. Waxaa laga yaabaa in 'adeegga cusub ee mashruuca' uu yahay natiijo uu ururku rabo balse u baahan dhaqaale dheeraad ah. Haddii ururku uusan si kaafi ah u maalingelin karin mashruuca, waxaa laga yaabaa in mashruuca la qaban waayo oo ujeeddooyinka ururka la xaqiijin waayo. Markaas natiijadu waxay noqon kartaa tu aan la jecleysan balse aan aad u darneyn, saa daraaddeed isku dayidda in mashruuca la qabto waxay noqon kartaa 'tu mudan in la isku biimeeyo khatarteeda'. Ururku wuxuu isku biimeynayaa khatar waxaa la dhihi karaa marka uu damacsan yahay in uu ku sii adkeysto fulinta mashruucan iyadoo ay duruufahaas jiraan.

3.8 Aasaaska Hannaanka Maareynta Khatarta

Jaantuska hoose wuxuu muujinayaa saldhigga asaasiga ah ee maareynta khatarta – Mabaadii'da, Heykalka, iyo Hannaanada– iyo sida ay isu waafaqsan yihiin. Saldhigyadan asaasiga ah mararka qaar waxaa loogu yeeraa naqshadda maareynta khatarta.



Mabaadii'du waxay xoojiyaan heykalka iyo hannaanka waxaana loogu talogalay in ay gacan ka geystaan kor u qaadidda fahmidda iyo aqoonsashada kaalinta muhiimka ah ay maareynta khatartu ka cayaarto ururka. Waxaa kaloo jira xiriir wareeg iyo noqnoqod leh oo u dhaxeeya Hannaanka iyo Heyklaka. Heykalku wuxuu ka warbixin doonaa sida aad u fahmayso Hannaanka. Natiijada ka dhalata fulinta hannaanku waxay dib ugu laaban doontaa, ama ay wax ka beddeli kartaa, Heykalka. Arrintan waxay si fiican kuugu sii caddaan doontaa marka aad dukumiintigan sii akhriso.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

4 Mabaadii'da Maareynta Khatarta



4.1 Guudmar

Sida horay loo soo tilmaamay, mabaadii'du waxay xoojiyaan heykalka iyo hannaanka waxaana loogu talogalay in ay gacan ka geystaan kobcinta fahmidda iyo aqoonsashada kaalinta muhiimka ah oo ay maareynta khatartu ka cayaarto ururka dhexdiisa.

Mabaadii'da maareynta khatarta:

- waxa ay abuureysaa oo ay ilaalineysaa qiyamka;
- waxa ay qeyb aasaasi ah ka tahay hannaanka urureed;
- waxa ay qeyb ka tahay go'aan qaadashada;
- waxa ay si cad ula tacaashaa hubaal la'aanta;
- waa ay nidaamsan tahay, qaabeysan tahay oo ay waqtiyeysan tahay;
- waxa ay ku saleysan tahay macluumaadka ugu fiican ee la heli karo;
- waxa ay waafaqsan tahay shuruudaha ururka;
- waxa ay xisaabta ku darsataa qodobbada dadka iyo dhaqanka la xiriira;
- waa ay hufan tahay oo loo dhan yahay;
- waa hab firfircoon, lagu celceliyay oo dhaqsina jawaab u bixin kara;
- waxa ay fududeyneysaa horumarin joogta ah ee ururka.

4.2 Waxa ay Abuureysaa oo ay Ilaalineysaa Qiyamka

'Abuurista iyo ilaalinta qiyamka' waxaa loola jeedaa maareynta khatartu waa in ay si cad uga qeybqaadataa xaqiijinta ujeeddooyinka ururkaaga iyo horumarinta waxqabadka dhammaan qeybaha kala duwan ee shaqooyinka. Taa beddelkeeda, haddii maareynta khatarta loo fuliyo u hoggaansanaan darteed (waana sida badanaa ka dhacda ururrada), waxaa 'abuurmaya' oo/ama 'la ilaalinayaa' qiyam iyadoo loo hoggaansamayo shuruuc ama dhinacyada daneeya ururka balse aan tixgelin la siin go'aan qaadashada, qoondeynta dhaqaalaha iyo wixii la mid ah.

4.3 Qaybta Asaasiga ah ee Hannaanka

Ka dhig maareynta khatarta qeyb walba oo ka mid ah heer kasta oo hannaanka ah iyo mas'uuliyadda maamule kasta.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

4.4 Qaybta Go'aan Qaadashada

Ka dhig maareynta khatarta qayb walba oo ka mid ah dhammaan heerarka go'aan qaadashada. U adeegso maareynta khatarta si aad u sameyso kala doorashooyin ku dhisan macluumaad iyo si aad u kala hormariso hawlaha.

4.5 Waxa ay la Tacaashaa Hubaal La'aanta

U adeegso maareynta khatarta si: aad ula tacaasho hubaal la'aanta aad wajaheyso, si aad u aqoonsato una qeexdo dabeecadda (abuurta) iyo nooca hubaal la'aannada ay tahay in ururkaagu uu la tacaalo, iyo si aad u ogaato waxa aad samayn karto si aad ula tacaasho hubaal la'aannada ururkaaga.

4.6 Waa ay Nidaamsan Tahay, Qaabeysan Tahay oo ay Waqtiyeysan Tahay

Hubi in habka ururkaaga ee maareynta khatartu yahay ku nidaamsan, qaabeysan oo waqtigana ku habboon. Hubi in habkaagu uu ka qeybqaadanayo wax ku oolnimada oo uu dhalinayo natiijooyin la isku halleyn karo.

4.7 Waxa ay ku Saleysan Tahay Macluumaadka ugu Fiican ee la Heli Karo

Hubi in hantida aad u isticmaaleyso maareynta khatartu tahay tu ku saleysan ilaha warbixinnada ugu fiican ee la heli karo. Hubi in go'aanleydu fahmayaan oo ay tixgelinayaan cilladaha iyo goldaloollada xogta ay u adeegsanayaan maareynta khatarta.

4.8 Waxa ay Waafaqsan Tahay Ururka

Hubi in habka ururkaaga ee maareynta khatartu yahay ku waafaqsan xaaaladda gudaha iyo dibadda ee gaarka ah ee galka khatarta.

4.9 Waxa ay Xisaabta ku Dareysaa Qodobbada Dadka iyo Dhaqanka

Hubi in habkaaga maareynta khatartu uu aqoonsan yahay oo uu tixgelinayo qodobbada dadka iyo dhaqanka la xiriira kuwaas oo saameyn ku yeelan kara xaqiijinta ujeeddooyinka ururkaaga. Tixgeli sida awoodaha bani'aadamka, aragtiyooyinkiisa iyo waxyaabaha uu damacsan yahay ay u fududeyn karaan ama caqabad ugu noqon karaan xaqiijinta ujeeddooyinkaaga.

4.10 Hufanaan Loo Dhanyahay

Hubi in habkaaga maareynta khatartu yahay ku hufan, cad, muuqda oo heli karo. Hubi in habkaaga maareynta khatartu yahay mid loo dhanyahay lugna ay ku leeyihiin dhammaan qeybaha kala duwan ee dhinacyada daneeya ururkaaga iyo go'aanleyda ururka.

4.11 Nidaam Firfircoon, Lagu Celceliyay Jawaab Degdeg ahna Bixin Kara

Hubi in habka ururkaaga ee maareynta khatartu yahay: ku firfircoon oo jawaab degdeg ah bixin kara; si joogta ah u dareemi kara is beddelka jawaabna ka bixin kara; yahayna ku joogta ah. Ku celi hannaankaaga maareynta khatarta mar walba iyo meel kasta oo loo baahdo in ujeeddooyinka la xaqiijiyo.

4.12 Waxa ay Fududeyneysaa Horumarin Joogta Ah

U adeegso maareynta khatarta si aad u horumariso dhammaan qeybaha kala duwan ee ururkaaga. Abuur istiraatiijiyado aad ku horumarineyso habka maareynta khatarta.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

5 Abuuridda Heykalka Maareynta Khatarta

Aasaaska Hannaanka Maareynta Khatarta



Heykalka Maareynta Khatarta



5.1 Guudmar ku Saabsan Heykalka Maareynta Khatarta

Heykalka Maareynta Khatartu waxa uu tilmaan ka bixinayaa sida maareynta khatartu ay ugu dhafan tahay ururka oo ay u waafaqsan tahay qeyb walba oo ka mid ah ururka:

- maareyntiisa,istiraatiijiyaddiisa iyo qorsheyntiisa;
- maamulkiisa,qorshe hawleedkiisa iyo shaqooyinkiisa;
- hannaankiisa warbixin-siinta gudaha iyo dibadda iyo hababka isla-xiriirka; iyo
- siyaasadaha, hannaannada, qiyamka iyo dhaqankiisa.

Waxa ay faahfaahineysaa isla xisaabtan, hababka warbixin-siinta iyo kor u qaadidda, iyo sidoo kale xiriirka iyo farsamooyinka wada tashiga ee dhinacyada daneeya ururka gudo iyo dibadba.

Waxaa lagu taliyaa in la heysto Dukumiinti Heykal. Ururrada waaweyn waxa ay heysan karaan dukumiinti Heykal oo ballaaran. Ururrada yaryar waxa ay heysan karaan dukumiinti kooban oo sheegaya fahmidda habka ballaaran ee uu ururku u maareeyo khatarta. Sidey ahaataba, tallaabooyinka faahfaahsan ee iman doona waa in fiiro gaar ah loo lahaadaa.

5.2 Abuuridda Heykalka Maareynta Khatarta

Tallaabooyinka abuuridda Heykalka Maareynta Khatarta waa sida soo socota:

- fiiro u lahow Mabaadii'da Maareynta Khatarta;
- fahan urukaaga iyo xaaladiisa (gudaha iyo dibaddaba);
- abuur Siyaasadda Maareynta Khatarta (tusaale ka fiiri Lifaaqa A);
- aasaas isla xisaabtan (yaa ka mas'uul ah iyo muxuu mas'uul ka yahay);
- maareynta khatarta ku dhaf hannaannada ururkaaga, dhaqankiisa iyo qiyamkiisa;
- ka qeybgeli shaqaalahaaga ururka si ay ururka dhexdiisa ugu yeeshaan millkiyad iyo saami taas oo aasaasi u ah abuuridda dhaqan;
- u qoondee waqti iyo dhaqaale kaafi ah;

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

- aasaas habab isla xiriir iyo warbixin-siin ee gudaha iyo dibadda leh (taas oo ka kooban maamulka iyo shaqaalaha iyo qolyaha ay wada-shaqayn ururka kala dhaxeyso, deeq-bixiyeyaasha iyo kuwa ugu muhiimsan oo ah ka faa'iideysteyaasha).

Waxaad ogaan doontaa in ay isa soo dhexgeli doonaan qaar ka mid ah tallaabooyinka iyo tallaabooyinka quseeya Hannaanka Maareynta Khatarta. Sida horayba loo soo sheegay, xiriir noqnoqod iyo wareeg leh ayaa ka dhexeeya Hannaanka iyo Heykalka: mid walba oo labadooda ah kan kale ayuu ka warbixiyaa.

5.3 Fiiro Gaar ah u Lahow Mabaadii'da Maareynta Khatarta

Ugu horreyntii, fiiro gaar ah u lahow sida dhammaan ama qaar ka mid ah 11-ka Mabda' ay uga warbixinayaan naqshadda, fulinta iyo guudmarka kaltanka (wareegga). Haddii aad ku shaqeyneyso Heykal horay u jiray, Mabaadii'da waxaad u adeegsan kartaa sidii cabbir (tuse) aad ku miisaameyso sida aad khatarta u maareyneyso una aqoonsaneyso meelaha u baahan in la hagaajiyo

5.4 Fahan Urukaaga iyo Xaaladdiisa

Marka aad aasaaseyso Heykalka, waxaad u baahan tahay in aad xisaabta ku darsato arrimaha bulshada, dhaqanka, lacagaha, xeerka iyo sharciyada deegaanka uu ururkaagu ku shaqeeyo. Waxaad u baahan doontaa in aad tixgelin siiso ujeeddooyinka iyo hawsha ururkaaga, qaabka maamulkiisa, baaxaddiisa iyo fudeydnimada ama cakirnaanta hannaannadiisa iyo shaqooyinkiisa.

5.5 Siyaasadda Maareynta Khatarta

Aasaaska Hannaanka Maareynta Khatarta



Heykalka Maareynta Khatarta



Siyaasadda Maareynta Khatarta ee ururkaagu waxa ay noqon doontaa oraah heerkeedu sarreeyo oo ujeeddooyinkeeda iyo tilmaamaheedu yihiin sidii khatarta loo maareyn lahaa.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Siyaasadda waa in ay aasaasaan Guddiga uuna hirgeliyo Agaasime Fulineed ama qof u dhigma. Waa in si habboon loola xiriiraa shaqaalaha iyo mutadawiciinta, si loo hubiyo in dhammaan hannaannada iyo fulinta maareynta khatarta loo qabtay si waafaqsan siyaasadda.

Sida caadiga ah, waa in Guddiga Maareynta Khatartu ama sarkaal kale oo ku shaqo leh uu dib-u-eegis ku sameeyo Siyaasadda sannadkiiba mar si loo hubiyo in Siyaasaddu ay dabooleyso baahiyada iyo duruufaha isbedbeddalaya ee ururka.

Tusaale ku saabsan dukumiintiga Siyaasadda Maareynta Khatarta waxaa laga heli karaa Lifaaqa A. Tusaalahan waxa loogu talogaley kaliya hagid; waxaad u baahan doontaa in aad waafajiso ururkaaga.

Siyaasadda waa in ay ku jiraan oraahyo tilmaamaya xammilitaanka khatarta iyo khatar isku biimeynta ururkaaga. Kuwaasi waa mowqifyada siyaasadeed oo ururka gacan ka siinaya in uu go'aan ka gaaro tallaabooyinka ay tahay in la qaado, haddiiba ay jiraan, oo ah khataraha la qiimeeyay heerarkooda kala duwan, sida khatar aad u daran, khatar sarreysa, tu dhexdhexaad ah ama hooseysa.

5.6 Naqshad

Aasaaska Hannaanka Maareynta Khatarta



Heykalka Maareynta Khatarta



5.6.1 Abuur Isla-xisaabtan

Si maareynta khatartu ay meelmar u noqoto waa in ay jirtaa isla-xisaabtan ku aaddan sida maareynta khatarta loogu dhafi lahaa ururka iyo maareynta khataro gaar ah. Tan macnaheedu waxa waaye in la hubiyo in khatarahaasi dad gaar ah loo xilsaaro kuwaas oo masuul ka ah maareynta khatarahaasi.

Caadi ahaan, Guddigu wuxuu masuuliyadda guud ee maareynta khatarta u wakiishaa Agaasime Fulineed, ama cid kale oo leh darajo/mansab la mid ah. Shaqada maareynta Heykalka iyo fulinta Hannaanka Maareynta Khatarta (aqoonsashada, qiimeynta iyo la tacaalidda khatarta) sida caadiga ahba waxaa qabta maamule sare –Isku-duwe, Sarkaal Maaliyadeed ama Sarkaal Sare ee Maamuleed – oo badanaa fahan fiican u leh hannaanka urureed. Ururrada qaar, magaca shaqada maamulahaasi wuxuu noqon karaa 'Isku-duwaha Maareynta Khatarta' ama 'Maareeye Khatar'. Kaliya ururrada waaweyn ayaa kaalinta 'Sarkaalka Sare ee Khatarta' si gaar ah loo dhigaa.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Si loo xaqiijiyo isla-xisaabtan ku saabsan khataro gaar ah, waxaa wanaagsan in khataraha loo xilsaaro maareeyayaal khatar oo la magacaabay kuwaas oo masuul ka ah maareynta khatarahaas. Maareeyayaasha khatartu badanaa waa maamulayaal ama sarkaallo sarsare kuwaas oo awood u leh in ay dhaqaale u qoondeeyaan abuuridda hawlo khatarta lagula tacaalo iyo in ay qorsheeyaan sidii khatarta loogu maareyn lahaa heer la aqbali karo. Sarkaalladan waxaa ka mid noqon kara kuwa mashaariicdaada maamula.

5.6.2 Maareynta khatarta ku dhaf hannaannada ururkaaga, dhaqankiisa iyo qiyamkiisa

Is waafajinta sida loo fuliyo maareynta khatarta iyo sida ururkaaga loo maamulo oo uu u shaqeeyo waxay dammaanad qaadeysaa in si weyn ay uga qeybqaataan maamulka iyo shaqaalaha marka ay timaado in khatar lala tacaalo. Tusaale ahaan, waa in aad isku daydaa in aad maareynta khatarta u adeegsato in aad ku wargeliso qorsho-hawleedyada iyo kuwa istiraatiijiyadeed. Waxaad kaloo u adeegsan kartaa maareynta khatarta in ay kaa gacan siiso hubinta iyo xaqiijinta ujeeddooyinka qorshooyinkaas. Mar walba oo ay suurtagal tahay waa in aad ku dadaashaa in maareynta khatarta aad ku dhisto hannaanno horay u jiray halkii aad ku dhisi lahayd kuwo gaar ah.

5.6.3 U qoondee dhaqaale iyo waqti kaafi ah

Dhammaan shaqooyinka maareynta khatarta waxa ay u baahan yihiin dhaqaale iyo waqti – waana laba wax oo urur kasta ku xaddidan (gabaabsi ku ah). Si qeyb ka ah Heykalka, haddaba, waxaad u baahan tahay in aad xaddiddo waqtiga iyo dhaqaalaha aad u qoondeyn lahayd shaqooyinka maareynta khatarta si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka ururka loona meelmariyo shuruudaha dhinacyada ururka daneeya.

Shaqooyinka asaasiga sida abuuridda SIyaasadda Maareynta Khatarta, Heykalka iyo Diiwaan Khatar waxay qaadan doonaan waqti iyo dadaal. Shaqooyinka socda sida qiimeynta khatarta iyo dib-u-eegista khatarta shaqo badan uma baahan doonaan, saa daraaddeed waa in ay qeyb caadi ah oo shaqooyinka maamule kasta ee ururka ka mid ah noqdaan.

Waxaad kaloo Heykalkaaga u sameyn kartaa jadwal waqtiyeed ku saabsan fulinta ujeeddooyinka iyo shaqooyinka kala duwan ee maareynta khatarta.

5.6.4 Aasaas habab isla-xiriir iyo warbixin-siin gudaha iyo dibadda ah leh

Shaqooyinka maareynta khatartu waxa ay u baahan yihiin in laga warbixiyo ama xiriir lagala sameeyo dhinacyada daneeya ururka ee gudo iyo dibad. Hawshan badankeeda waxaa lagu qaban karaa hababka isla-xiriirka iyo warbixin-isa siinta ee ururkaagu leeyahay, haddaba, tani waa in aad ku sii xirtaa Heykalka. Waxaa laga yaabaa in aad ogaato in hababka dheeriga ah ee diiradda saaraya khatarta loo baahan yahay in sarkaallada shaqada ku leh, shaqaalaha, mutadawiciinta iyo dhinacyada kale ee ururka daneeya laga wargeliyo hawlaha maareynta khatarta ku saabsan. Haddii arrintu saas tahay, waxaad u baahan doontaa in aad ogaato oo aad abuurto habab noocaas ah oo qeyb ka ah Heykalka.

5.6.5 Abuur hagid gacan siisa falanqeynta iyo qiimeynta khataraha

5.6.5.1 Guudmar

Maamuleyaashaada iyo shaqaalahaaga waxay u baahan doonaan hagid si ay si wanaagsan ugu falanqeeyaan oo ay u qiimeeyaan khataraha ay ogaanayaan inta ay ku gudojiraan hannaanka

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

maareynta khatarta. Si aad u hesho bar aad ka ambaqaado, waxaad u baahan doontaa in aad go'aammo ka gaarto oo aad hagid ka bixiso arrimahan soo socda:

- Aqoonsashada qeybaha khatarta
- Sidee loo cabbiraa 'suurtagalnimada' dhicidda khatar?
- Sidee loo cabbiraa 'cawaaqibta' khatar dhacday?
- Sidee loo cabbiraa 'heerka guud' ee khatarta?
- Go'aamada quseeya kordhinta, heysashada iyo la tacaalidda khatarta.
- Sidee loo diiwaangeliyaa warbixinnada khatarta?

Waxaa laga yaabaa in aad rabi karto lafagguridda mid walba oo ka mid ah tallaabooyinkan. Si kastaba ha ahaatee, habka aad ula tacaaleyso khatarta, qeybaha khatarta; iyo heerarka cawaaqibta, suurtagalnimada , iyo guud ahaan khatartu waxaa loo baahan yahay in ay ka muuqdaan:

- Baaxadda ururka, dhaqankiisa, qiyamkiisa, ujeeddooyikiisa iyo shaqooyinkiisa;
- halbeegga guud ee qiimeynta khatarta ee ururka; iyo
- kormeerrada maareynta khatarta ee horay u jiray.

5.6.5.2 Aqoonso Qeybaha Khatarta

Ka hor inta aanu ururkaagu isku dayin aqoonsashada khataro gaar ah, aqoonsashada khataraha waxay gacan ka geysaneysaa in la garto qeybaha khataraha (goobaha ballaaran) kuwaas oo ay khatartu ka dhacdo. Qeybahaasi waxay hagi doonaan shaqada faahfaahsan ee aqoonsashada khataro gaar ah.

Waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay in aad diiradda saarto saddexda goob ee ballaaran ee khatarta oo ururka soo wajahda:

1. Khatar Xaaladeed: waa qodobbada bannaanka ka ah oo ka madaxbannaan xakameynta NGO-yada.

2. Khatar Mashruuceed: waa khatarta ka dhalata in la xaqiijin waayo ujeeddooyinka mashruuca, la dabooli waayo baahyaha ka faa'iideysayaasha mashruuca ama waxyeello kale oo mashruuca ku timaada.

3. Khatar Urureed: waa khataraha saameynta ku leh ammaanka iyo nabadgelyada shaqaalaha iyo sumcadda NGO-yada.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Jadwalka soo socda wuxuu tusaale ka bixinayaa qeybaha khatarahaasi oo ka mid ah goobahaasi ballaaran:

Xaaladeed	Mashruuceed	Urureed
Musiibooyin dabiici ah Falal argaggixiso Xasillooni-darro siyaasadeed Maqnaanshada kaabayaal dhaqaale Musuqmaasuq	Weecin Adeeg bixin liidata Mashruuca iyo/ama hannaanka kormeeridda tayada oon loo hoggaansamin	Shaqo ka tagis ba'an Maareyn dhaqaale Maareynta dadka iyo dhaqaalaha Awood la'aan Wax is-dabamarin

Dukumiintigan waa hagid oo kaliya. Waxaad u baahan doontaa in aad abuurto qaybaha khatarta gaarka u ah ururkaaga. Haddii aad doonto waxaad u habayn kartaa qaybaha khatarta si alifba' ah, adiga oo u eegaya sidey u kala muhiimsan yihiin ama waxaad u habayn kartaa si kale.

5.6.5.3 Sidee loo cabbiraa 'suurtagalnimada' dhicidda khatar?

Waxaa jira saddex tallaab oo muhiim ah oo lagu xaddido sida urukaagu uu u cabbiri lahaa suurtagalnimada (khatar):

- tallaabada 1aad – dooro miisaan
- tallaabada 2aad – dhibic kasta oo miisaanka ka mid ah calaamadee
- tallaabada 3aad – dhibic kasta oo miisaanka ka mid ah sii tusaalooyin aad u faahfaahsan

Tallaabada 1aad: Dooro miisaan

Waxaad miisaan ahaan u dooran kartaa tirada aad doonto oo dhibco ah. Si guud, miisaannadu waxay leeyihiin 3-7 dhibco oo ah darajada ugu hooseysa iyo tan ugu sarreysa ee suurtagalnimada. Tirada dhibcaha miisaankaagu waxay ku tiirsanaan doontaa shuruudaha ururkaaga. Ururkaagu ma waxa uu doonayaa in hawlaha uu si sahlan u qabto? Ma waxaad dooneysaa dhibco badan si aad u muujiso farqiyada suurtagalnimada? Waxaad kaloo rabi kartaa in aad fiiro gaar ah u yeelato haddii aad dooneyso in aad qaadato mowqif dhexdhexaad ah? (miisaan leh tirooyin kisi ah) Ama ma waxaad dooneysaa in aad dadka ku qasabto in ay qaataan go'aanno? (miisaan leh tirooyin dhaban ah).

Tallaabada 2aad: Dhibic walba oo miisaanka ka mid ah calaamadee

Marka aad doorato miisaan, waxaad u baahan tahay in aad dhibic kasta oo miisaanka ka mid ah ugu calaamadeyso qaab la xiriira khatarta oo shaqaalaha iyo maamulayaashu ururkaaguna si sahlan ugu fahmi karaan. Hoos waxaa lagu muujiyay tusaalooyinka calaamadaha miisaan shan dhibic (bar) leh.

Tusaalaha 1aad	Tusaalaha 2aad	Tusaalaha 3aad	Tusaalaha 4aad	Tusaalaha 5aad
Aad Suurtagal U Ah	Aad Macquul u Ah	Ku Dhowaad La Hubo	La Hubo	La Hubo
Laga Yaabo	Macquul Ah	Laga Yaabo	Laga Yaabo	Macquul Ah
Laballabo	Dhexdhexaad	Aan La Qiyaasi Karin	Suurtagal Ah	Aan La Qiyaasi Karin
Aan Laga Yaabin	Aan Macquul Ahayn	Aan Laga Yaabin	Aan Laga Yaabin	Aan Macquul Ahayn
Aan Suurtagal Ahayn	Aad U Fog In Ay Dhacdo	Aan Suurtagal Ahayn	Dhif Ah	Aan Suurtagal Ahayn

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Tallaabada 3aad: Dhibic kasta oo miisaanka ka mid ah sii tusaalooyin aad u faahfaahsan

Marka aad dhibic walba oo ka mid ah miisaankaaga aad u doorato calaamado fudfudud, waxaad u baahan tahay in aad faahfaahin dheeri ah ka bixiso waxa loola jeedo calaamad kasta. Jadwalka hoose ayaa bixinaya tusaalooyin.

Heerka Suurtagalnimada	Tusaalooyin Tilmaan Bixinaya	Tusaalooyinka Ixtimaalka (Saadaasha)
Aan Suurtagal Ahayn	• Kaliya dhici kara xaalado khaas ah. • Soo noqnoqosho caadi ah 500 ee sanaba hal mar ama ka badan. • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >0.005% (20,000-kii jeerba hal mar)	<20%
Aan Dhici Karin	• Lama filayo in ay dhacdo. • Lagama hayo dhacdooyin ama caddeymo la diiwaangeliyay. • Fursad ama sabab ay ku dhacdo ay aad u yar tahay. • Soo noqnoqosho caadi ah 100-kii sanaba hal mar. • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >0.05% (2,000-kii jeerba hal mar)	>20% - 40%
Suurtagal Ah	• Dhici karta mararka qaar. Leh dhacdooyin iyo caddaymo diiwaangashan oo aad u yar ama dhif ah. • Leh sabab ama fursad ay ku dhici karto. • Soo noqnoqosho caadi ah 20-kii sanaba hal jeer. • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >0.5% (200-kii jeerba hal mar)	>40% - 60%
Dhici Karta	• Macquul ah in ay dhacdo/soo noqnoqota. • Leh caddeyn xoog leh iyo dhacdooyin la diiwaangeliyay oo joogto ah. • Dhici kari doonta xaalado badan dhexdooda. • Soo noqnoqosho caadi ah 5/7 sanaba mar • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >5% (20-kii jeerba hal mar)	>60% - 80%
Ku Dhowaad La Hubo	• Macquul ah in ay dhacdo/soo noqnoqota. • Leh caddeyn xoog leh iyo dhacdooyin la diiwaangeliyay oo heerkoodu uu aad u sarreeya • Soo noqnoqosho caadi ah 5-tii sanaba ama ka yar. • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >50% (2-dii jeerba hal mar)	>80% - 100%

Dukumiintigani waa uun haggis iyo tusaaleyn. Waxaad u baahan doontaa in aad halbeegga suurtagalnimada khatarta ku qeexdo hab ku habboon ururkaaga.

5.6.5.4 Sidee loo cabbiraa 'cawaaqibta' khatar marka ay dhacdo?

Waxaa jira tallaabooyin saddex ah oo lagu xaddido sida ururkaagu u doonayo in uu u cabbiro cawaaqibta:

- Tallaabada 1aad – Dooro miisaan
- Tallaabada 2aad – Calaamadee dhibic kasta oo miisaanka ka mid ah
- Tallaabada 3aad – Dhibic kasta oo miisaanka ka mid ah sii tusaalooyin faahfaahsan

Tallaabada 1aad: Dooro miisaan

Waxaad miisaan ahaan u dooran kartaa tirada aad doonto oo dhibco ah. Si guud, miisaannadu waxay leeyihiin 3-7 dhibco oo ah darajada ugu hooseysa iyo tan ugu sarreysa ee suurtagalnimada. Tirada dhibcaha miisaankaagu waxay ku tiirsanaan doontaa shuruudaha ururkaaga. Ururkaagu ma waxa uu doonayaa in hawlaha uu si sahlan u qabto? Ma waxaad

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

dooneysaa dhibco badan si aad u muujiso farqiyada suurtagalnimada? Waxaad kaloo rabi kartaa in aad fiiro gaar ah u yeelato haddii aad dooneyso in aad qaadato mowqif dhexdhexaad ah? (miisaan leh tirooyin kisi ah) Ama ma waxaad dooneysaa in aad dadka ku qasabto in ay qaataan go'aanno? (miisaan leh tirooyin dhaban ah).

Tallaabada 2aad: Calaamadee dhibic kasta oo miisaanka ka mid ah

Marka aad doorato miisaan, waxaad u baahan tahay in aad dhibic kasta oo miisaanka ka mid ah ugu calaamadeyso qaab la xiriira khatarta oo shaqaalaha iyo maamulayaashu ururkaaguna si sahlan ugu fahmi karaan. Hoos waxaa lagu muujiyay tusaalooyinka calaamadaha miisaan shan dhibic (bar) leh.

Tusaalaha 1aad	Tusaalaha 2aad	Tusaalaha 3aad	Tusaalaha 4aad
Aan Muhiim Ahayn	Aan Darneyn	Aan Muhiim Ahayn	Aan Muhiim Ahayn
Aan Darneyn	Dhexdhexaad	Licibsaqiir	Yar
Dhexdhexaad	Daran	Dhexdhexaad	Dhexdhexaad
Muhiim	Halis ah	Daran	Daran
Musiibo Ah	Aad u Daran	Aad u Daran	Musiibo Ah

Tallaabada 3aad: Dhibic walba oo miisaanka ka mid ah sii tusaalooyin faahfaasan

Marka aad dhibic walba oo ka mid ah miisaankaaga aad u doorato calaamado fudfudud, waxaad u baahan tahay in aad faahfaahin dheeri ah ka bixiso waxa loola jeedo calaamad kasta. Qeyb walba oo ka mid ah khatarta waa in shaqadan laga qabtaa.

Jadwalkan hoose wuxuu bixinayaa tusaalooyin ku saabsan laba qeybood.

Heerka Cawaaqibta	**Caafimaad iyo Badbaado**	**Sumcad**
Aan Muhiim Ahayn	Shilalka yaryar uma baahna gargaar degdeg ah	Mucaaradnimo maxalli ah oo ku aaddan dareenka dadweynaha ama cabashooyin
Aan Darneyn	Gargaar degdeg ah waa loo baahan yahay	Dareen warbaahin oo gurracan iyo/ama walaac bulshada maxalliga oo aad u sarreeya
Dhexdhexaad	Halis ah laakin ay ka dhalan karto naafo laga soo kabsan karo oo u baahan in isbitaal wax looga qabto	Dareen warbaahin oo gurracan oo aad u sarreeya ama aan muhiim ahayn.
Weyn	Halis weyn ah balse ay ka dhalan kartonaafo laga soo kabsan karo oo u baahan in isbitaal lagu daweeyo	Gadood dadweyne ama warbaahin oo aad u sarreeya (faaqidaad maxalli ah)
Aad u Daran	Qof ama dad dhimasha u keeni karta ama xanuun naafa sababa ama aad u daran oo ay ka dhalan karto naafo aan laga kabsan karin (>30%)	Gadood dadweyne ama warbaahin oo joogto ah (tebinta wararka heer qaran ama gobol)

Dukumiintigani waa uun hagis iyo tusaaleyn guud. Waxaad u baahan doontaa in aad cawaaqibta khatarta ku qeexdo halbeeg cayiman ee urukaaga.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

5.6.5.5 Sidee loo cabbiraa 'heerka guud' ee khatar?

Si loo qiimeeyo heerka guud ee khatarta, ururkaagu wuxuu u baahan doonaa in uu abuuro shax khatar (fiiri tusaalaha hoos lagu bixiyay). Shaxda khatarta ee ururkaaga waa in la dhisaa iyadoo la adeegsanayo heerarka suurtagalnimada iyo cawaaqibta lagu muujiyay tallaabooyinkii hore.

Suurtagalnimada	Cawaaqibta: Aan Muhiim Ahayn	Aan Darneyn	Dhexdhexaad	Weyn	Aad u Daran
Ku Dhowaad La Hubo					
Dhici Karta					
Suurtagal Ah					
Aan Dhici Karin					
Aan Suurtagal Ahayn					

Heerka guud ee khatarta waxaa laga soo xasiliyaa (helaa) isugeynta suurtagalnimada iyo cawaaqibta waxayna ka korortaa dhibicda ugu hooseysa ee dacalka hoose ee bidix ilaa dhibicda ugu sarreysa ee dacalka kore ee midig.

Marka aad heysato shax sida tan kore, waxaad u baahan tahay in aad midabeyso afargees kasta adiga oo ku saleynaya isku biimeynta khatarta ee urukaaga (fiiri tusaalaha hoose).

Daran	
Sare	
Dhexdhexaad	
Hoose	

Haddii ururkaagu khatarta u hayo isku biimeyn hooseysa shaxdaada waxaad ku badin kartaa midab cas (waxay u baahan tahay wax ka qabashada maamul heerkiisu sarreeyo). Haddii ururkaagu khatarta u hayo isku biimeyn heerkeedu sarreeyo, shaxdaada si kale ayaad u midabeyn kartaa.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Isku Biimeyn Khatar Hooseysa



Isku Biimeyn Khatar Sarreysa



Dukumiintigani waa hagid iyo tusaaleyn. Waxaad u baahan doontaa in aad abuurto shax khatar oo ururkaaga u gaar ah. Sida kor lagu soo xusay, ururrada yaryar waxay uun u baahan yihiin in ay lahaadaan saddex heer oo cawaaqib: Weyn, Dhexdhexaad iyo Yar.

5.6.5.6 Go'aamada Quseeya Kordhinta, Yeelashada iyo La-tacaalidda

Maamuleyaashu iyo shaqaaluhu waxa ay u baahan yihiin in laga hogatuso waxay ay sameyn lahaayeen marka ay qiimeeyaan heerka guud ee khatar. Waxaad u baahan doontaa in aad tilmaamo u abuurto tallaabooyinka ay tahay in la qaado marka heerka khatar kasta lala tacaalayo. Tallaabooyinku waxa ayu dhaxeyn karaan heysashada khatar (la tacaalidda iyo kormeeridda heerka maamul ee hadda jira) iyo kordhin. Jadwalka hoose ayaa bixinaya tusaalooyin ku saabsan 'Tilmaamaha Kordhinta & Heysashada' iyo 'Tilmaamaha La Tacaalidda'.

Tusaalaha Tilmaamooyinka Kordhinta iyo Yeelashada/Haysashada

Heerka Khatarta	Tilmaamaha La Tacaalidda	Tilmaamaha Kordhinta & Haysashada
Daran	Waxay u baahan tahay wax ka qabasho degdeg ah si loo maareeyo khatarta ama loo yareeyo waxyeelladeeda	U Wareeji Guddiga, khataraha noocan ah caadiyan lama aqbalo lamana haysto
Sare	Waxay u baahan tahay in la sameeyo falanqeyn dhib/dheef si loo qiimeeyo heerka ay tahay in lala tacaalo khatarta – la kormeero si loo hubiyo in khatartu aysan saameyn xun yeelan muddo ka dib	U wareeji Madaxa Hay'adda, khataraha noocan ah caadiyan lama aqbalo lamana haysto
Dhexdhexaad	Waxay u baahan tahay kormeer joogta ah si loo hubiyo in waxyeellada khatarta la maareeyay, dhibaatadeeda la yareeyay oo natiijooyinkeedana la kormeeray	U wareeji sarkaal sare oo shaqo ku leh ama maamule darajadiisu sarreyso, xaddid tallaabooyinka maareynta khatarta, khataraha noocan ah waa la heysan karaa ama waxaa lagu maareyn karaa heer fulineed.
Hoose	Waxaa ku filan maareynteeda hannaanka gudaha iyo kormeerrada joogtada ah.	Wargeli sarkaalka ay quseyso ama heer fulineed si loo maareeyo, khataraha noocan ah badanaa waa la heystaa.

Dukumiintigani waa uun hagid. Waxaad u baahan doontaa in aad abuurto tilmaamo ku habboon qaab dhismeedka ururkaaga iyo heerarka masuuliyadda sida ku qeexan ururkaaga.

5.6.5.7 Sidee loo diiwaangeliyaa macluumaadka khatarta?

Diiwaanka Khatarta waa dukumiintiga ka kooban natiijooyinka laga helay falanqeynta khatarta iyo qorshaha ka jawaabidda khatarta. Hannaanka Maareynta Khatarta wuxuu dhalin doonaa warbixinno muhiim ah oo badan. Diiwaanka Khatartu wuxuu gacan ka geysanayaa in uu warbixinnadaas si nidaamsan oo isku dubbaridan u diiwaangeliyo. Sidoo kale Diiwaanka Khatartu waa hab wanaagsan oo aad kula socon karto khataraha aad aqoonsato iyo diiwaanka tallaabooyinka aad u isticmaasho sidii aad u maareyn lahayd khatarahaasi.

Bogga soo socda ayaa lagu bixiyay tusaale dhammeystiran oo ku saabsan Diiwaanka Khatarta (khaanadaha ligan/taagtaagan). Uma baahnid in aad wada fahanto ujeeddada khaanadaha. Fahankaagu wuu kordhi doonaa mar walba oo aad akhriso ama isticmaasho mid walba oo ka mid ah tallaabooyinka hannaanka maareynta khatarte ee qeybta soo socota. Xusuusnow in tusaalaha soo socda ee diiwaanka khatartu kaliya uu yahay tusaale iyo hagid.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Tusaalaha Diiwaanka Khatarta

Khaanadda 1aad	Khaanadda 2aad	Khaanadda 3aad	Khaanadda 4aad
Tirada Khatarta	Qaybta Khatarta	Tilmaanta Khatarta	Kormeerka/tallaabooyinka Hadda Jira
1	U Hoggaansamid	Haddii warbixin kaafi ah la siin waayo deeqbixiyaha waxay sababeysaa kalsoonidarro	Heykalka maamul wanaagga iyo warbixin-siinta Siyaasadda/Hababka
2	Caafimaad& Badbaado	Haddii shaqaaluhu si fiican u raaci waayan hababka waxay sababi kartaa dhaawacyo	Siyaasada Caafimaad iyo Badbaado, hababka, tababarka iyo kormeerka gudaha

Khaanadda 5aad	Khaanadda 6aad	Khaanadda 7aad	Khaanadda 8aad
Cawaaqib	Suurtagalnimada	Heerka Khatarta	Maareeye Khatar
Weyn	Suurtagal Ah	Sare	Agaasimaha Guud
Dhexdhexaad	Aan Suurtagal Ahayn	Dhexdhexaad	Sarkaal Caafimaad

Khaanadda 9aad	Khaanadda 10aad	Khaanadda 11aad
Tirada La Tacaalidda	Khataraha Lala Tacaalay	Qorshaha La Tacaalidda (Tusaha Qorshaha Faahfaahsan)
1	1	Guudmar oo xooji nidaamka warbixin-siinta kuna soo dar hannaan hannaan hubin
2	2	Hubin ku samee hannaanka caafimaadka iyo badbaadada/Samee wax kastoo horumarin ah oo loo baahn karo

Khaanadda 12aad	Khaanadda 13aad	Khaanadda 14aad	Khaanadda 15aad
Haraaga Cawaaqibta	Haraaga Suurtagalnimada	Haraaga Heerka Khatarta	Tallaabo Dheeri Ah
Weyn	Aan Suurtagal Ahayn	Dhexdhexaad	
Yar	Aan Muhiim Ahayn	Hoose	Ka warbixi shilalka iyo dhaawacyada badanaa dhaca bishiiba mar

Fiiro gaar ah: Khatarahani dib ayaa loo qiimeeyay ka dib markii la fuliyay qorshooyinka la-tacaalidda khatarta.

Waxaad abuuri kartaa Diiwaan Khatar oo gacan ku samays ah oo sahlan adiga oo adeegsanaya Word ama Excel. Dadku badi waxay doorbidaan Excel maadaama aad khaanado badan ku dari karto (jadwalka), macluumaadkana aad kala sooci karto (haddii loo baahdo).

Haddii aad u baahan tahay in aad adeegsato, dabcan waxaa jira aalado loogu talogalay maareynta khatarta iyo softiweerro takhususeed oo loo isticmaalo maareynta khatarta. Si kastaba, inta badan diiwaanka macluumaad khatar oo fudud ayaa kugu filan.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Jadwalka hoose ayaa lagu tusaaleeyay liiska-hubinta su'aalaha ay tahay in aad is weydiiso marka aad abuureyso Diiwaan Khatar.

Liiska-hubineedka Abuuridda Diiwaan Khatar

Liiska-hubinta ee soo socda waxaa loo diyaariyay in uu kaa caawiyo abuuridda Diiwaankaaga Khatar. Wuxuu ka kooban yahay su'aalaha muhiimka ah ay tahay in la is weydiiyo, su'aalahaasina waxa ay ku tusayaan sida qeybaha kala duwan ee Diiwaanka Khatartu ay isugu xiranyihiin.

Xiriirka & Wada Tashiga (10) – Hannaanka Socda • Inta uu socday Hannaanka Maareynta Khatartu, wada xiriirka ma la siiyay fiiro gaar ah? • Dhinacyada daneeya ururka ma la xaddiday? • Go'aamo ma laga gaaray waxa iyo cidda lala xiriirayo? • Ma la aasaasay hannaan wada xiriirid iyo warbixin-siin? Xiriirro: Qeybta joogtada ah ee Hannaanka Maareynta khatarta	**Tallaab**	**Walaaca Ugu Weyn**	**Kormeer oo Dib-u Eeg (11) – Hannaanka Socda** • Hannaannada la aasaasay ma la raacay? • Ma jirtaa baahi loo qabo in loo kordhiyo ama laga yareeyo khata heerka xiga? Xiriirrada: Qeybta joogtada ah ee Hannaanka Maareynta khatarta
	1. Aasaasidda Xaaladda (7)	• Ujeeddooyinka ururka xisaabta ma lagu darsaday? • Dhinacyada daneeya ururka ma la xaddiday? • Halbeegga khatarta ma la qeexay? • Halbeegga qiimeynta khatarta ma la qeexay?	
	2. Qiimeynta Khatarta (8)	• Maxaa qaldami kari, goorma iyo sidee? • Waa maxay dhibka ku imaan kara waqitga, lacagta iyo waxqabadka? • Intey la eg tahay suurtagalnimada ay ku dhici karto? • Waa maxay saameynta khatar kasta? • Waa maxay isha khatarta? • Maxaa la samayn karaa si loo yareeyo/xakameeyo khatarta?	
	3. Falanqeynta Khatarta (8.2)	• Ma jiraan tallaabooyin hadda la isticmaalo? • Cawaaqibta khatarta xisaabta ma lagu darsaday? • Halbeegga suurtagalnimada ma la hirgeliyay? • Shaxda khatarta ma la abuuray?	
	4. Qiimeynta Khatarta (8.3)	• Khataraha ma loo barbardhigay halbeegga la dejiyay? • Tilmaamaha kordhinta iyo heysashada khatarta ma la abuuray? • Go'aan ma la qaatay khatarta lagula tacaalo? • Haddii ay haa tahay, fiiri tallaabada 3aad • Haddii ay tahay maya, horay u wad kormeeridda iyo guudmarka khataraha.	
	5. La-tacaalidda Khatarta (9)	• Dhamman khiyaaraadka la tacaalidda ma la xaddiday? • Dhammaan khiyaaraadka ma la qiimeyay? • Qorshooshinka la tacaalidda ma la diyaariyay oo diyaar ma u yihiin in la fuliyo? • Khataraha hara ma la falanqeeyay oo ma la qiimeeyay? • Fiiro gaar ah u yeelo shuruudaha wada xiriirka iyo wada tashiga.	

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

5.7 Fulin

Aasaaska Hannaanka Maareynta Khatarta



Heykalka Maareynta Khatarka



5.7.1 Qorshaha mashruuca

Ilaa hadda sida aad ka garan karto akhrinta dukumiintigan, waxaa jira wax badan oo ay tahay in si wanaagsan loo qabto si loo maareeyo khatarta. Waxay u muuqan kartaa shaqo badan balse haddii aad u jejebiso qeybo yaryar oo aad u maamusho sidii mashruuc oo kale waxaad noqoneysaa qof ku guuleystay hawshiisa. Jaantuska soo socda wuxuu tilmaamayaa tallaabooyin aad u baahan karto in aad fiiro gaar ah u yeelato marka aad abuureyso qorshaha mashruuca fulinta maareynta khatarta ee ururkaaga.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

5.7.2 Taageerada Unugga Maareynta Khatarta (UMK)

Maamuleyaasha NGO-yada iyo shaqaalaha waxay heli karaan taageerada iyo caawinaadda UMK iyaga oo iimeyl (farriin) ku diraya ngoenquiries.rmu.so@one.un.org. Unugga Maareynta Khatarta waxaa kale oo uu bixinayaa tababar maareynta khatarta ku saabsan oo 'online' (interneetka dhexdiisa) iyo mid 'fasal' la fariisanayo isugu jira.

Tababarka Fasalka ee UMK

UMK wuxuu bixinayaa koorso la xiriirta 'Hordhaca Maareynta Khatarta' oo fasal la fariisanayo taas oo ay ka qeybqaadanayaan qiyaas ahaan 20 qof oo soconeysa ku dhowaad hal maalin.

Ujeeddada koorsadan waa in ay bixisaa hordhac aasaasi ah oo ku saabsan maareynta khatarta iyada oo la adeegsanayo ISO 31000 Risk Management Standard.

NGO-yada daneynaya in ay ka qeybgalaan tababarkan waa in ay buuxiyaan foom tababarka lagu codsanayo oo ay u diraan ngoenquiries.rmu.so@one.un.org. NG0-gii codsada wuxuu bixin doonaa qarashka loojiistikada la xiriira dadka loo tababarayo. UMK wuxuu bixin doonaa macallimiinta tababarka fududeynaya iyo buugaagta.

Tababarku waa mid ku xiran hadba dalabka inta uu la egyahay, saa daraaddeed waxaa lagu jadwaleyn doonaa marka ay jirto dan kaafi ah.

Tababarka Intarneetka ee UMK

Sidoo kale UMK wuxuu bixiyaa tababar ku saabsan maareynta khatarta oo intarneetka dhexdiisa ah. Waa tababar qofka ku xiran oo online ah kaasoo la qaab ah kan UMK ee fasalka la fariisanayo. Tababarku wuxuu leeyahay 5 cutub waxaana jira cutub kasta marka uu dhamaado imtixaan yar oo kedis ah iyo imtixaan weyn ka dib marka koorsadu ay dhamaato. Qof walba oo si guul leh u dhameysta koorsada waxaa loo soo saari doonaa shahaado.

Shaqaalaha NGO-gii daneynaya koorsadan online-ka ah ha la xiriireen qeybta NGO-gooda quseysa ama Dalladda NGO-ga.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

5.8 Kormeer iyo Dib-u Eegis

Aasaaska Hannaanka Maareynta Khatarta



Heykalka Maareynta Khatarka



5.8.1 Hordhac Guud

Maareynta khatartu waa in ay ahaataa tu isbeddelka jawaab degdeg ah ka bixisa – gaar ahaan ururka dhexdiisa iyo deegaanka dibadda ee ururka ku hareereysan. Haddaba, hawlaha guudmarka iyo kormeerku waa in ay joogta ahaadaan, oo ay ku dhafnaadaan tallaaba walba oo ka mid ah Hannaanka Maareynta Khatarta.

5.8.2 Aasaas Habab Kormeerid

Marka aad adeegsato qorshooyinka la tacaalidda, xakameynta iyo kormeeridda khataraha, waxaad hubin kartaa in khatarihii loo maareeyay si waafaqsan Heykalka iyo Siyaasadda Maareynta Khatarta ee Ururkaaga. Waxaad kaloo xaddidi kartaa wax ku oolnimada (saameynta, faa'iidooyinka iyo khasaarooyinka) istiraatiijiyooyinkaaga maareynta khatarta. Haddaba kormeeriddu waxa ay ka mid tahay hannaan horumarin oo joogta ah waxayna xoojin doontaa qiimaha ururee d.

5.8.3 Aasaas Habab Guudmar iyo Warbixin-siin

Marka laga yimaado qabashada hawlo kormeerid oo joogta ah, waxaan kugula talineynaa in aad aasaasto habab warbixin-siin iyo guudmar oo rasmi ah. Hababkan waxay shardi u yihiin maamul wanaagga, waxay maamulka warbixinno cusub ka siinayaan khataraha, qorshooyinka la tacaalidda khatarta iyo arrin walba oo soo cusboonaata, waxay kaloo Guddiga u hubinayaan in khataraha loola tacaalay si waafaqsan Heykakalka iyo Siyaasadda Maareynta Khatarta.

Hababka rasmiga ah ee guudmarka iyo warbixin-siinta sidan ayay u eg yihiin:

- Sanadkiiba (caadiyan), guudmar ku samee Heykalka iyo Siyaasadda Maareynta Khatarta ee ururkaaga, halbeegga qimeynta khatarta iyo Hannaanka Maareynta Khatarta iyo sida uu u waafaqsan yahay hannaanka ururkaaga.
- Bishiiba ama saddexdii biloodba mar (ama hadba kal-fadhiga Guddigu waxa uu yahay) Guddiga warbixin cusub ka sii Diiwaanka Khatarta iyo qorshooyinka la tacaalidda khatarta (gaar ahaan kuwa 'daran' iyo 'khataraha aadka u sarreeya').
- Bishiiba mar (ama hadba marka kal-fadhiga maamulka sare ama shaqaalaha la qabto) guudmar ku samee khataraha iyo qorshooyinka la tacaalidda khataraha.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

5.9 Horumarin Joogta ah

Aasaaska Hannaanka Maareynta Khatarta



Heykalka Maareynta Khatarka



5.9.1 Guudmar

Sida horay loo soo xusay, waxaa jira xiriir noqnoqod iyo wareeg leh oo u dhexeeya Heykalka iyo Hannaanka: mid kasta oo ka mid ah ka kale ayuu ka warbixiyaa. Tan macnaheedu waxaa waaye in heykalka wax laga beddeli karo, la horumarin karo iyadoo lagu dhisayo waayo-aragnimada laga helay hirgelinta hannaanka maareynta khatarta. Intaa waxaa dheer, in hannaanka maareynta khatarta wax laga beddeli karo/ la horumarin karo iyadoo lagu dhisayo dib-u-eegisyada/horumarinta lagu sameeyay heykalka.

5.9.2 Kormeer iyo Dib-u eegis

Kormeeridda iyo dib-u eegidda heykalka iyo hirgelinta hannaanka maareynta khatarta waxay ka mid noqon doonaan mid ka mid ah ilaha ugu waaweyn ee aqoonsashada goldaloollada soo bixi kara ama toostoosinta loo baahan karo in la sameeyo.

5.9.3 Hirgelinta Hannaanka Maareynta Khatarta

Hirgelinta joogtada ah ee hannaanka maareynta khatartu wuxuu soo muujin karaa dhinacyada heykalka/naqshadda ee u baahan in la beddelo/la horumariyo (tusaale ahaan khataraha aan lahayn qeyb lagu daro ama ay adag tahay in la qiimeeyo suurtagalnimadooda/ cawaaqibtooda). Xaaladahan oo kale, wax ka beddelid/ horumarin waa in lagu sameeyaa heykalka/naqshadda.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6 Hannaanka Maareynta Khatarta



6.1 Guudmar ku Saabsan Hannaanka Maareynta Khatarta

Guud ahaan, Hannaanka Maareynta Khatartu waa dhismaha guud ee hawlaha aad ku qabanayso in aad xaddiddo (aqoonsato), qiimeyso, maareyso ama aad kormeerto khataro walba oo urukaaga soo wajihi karo. Shaxanka hoose ayaa tilmaan ka bixinaya tallaabooyinka ugu waaweyn.



Tallaab walba waxaa lagu qaadaadhigay bogagga soo socda. Mar walba oo aad sii akhriso tallaabooyinkaas, waxaad dhalin doontaa macluumaad la gelin karo Diiwaankaaga Khatarta.

Ogow in 'Wada Xiriirka iyo Wada Tashigu' iyo 'Kormeerka iyo Guudmarku' ay yihiin hannaanno joogta ah oo tallaab walba qabashadeeda la socda. Waxaa lagu qaadaadhigay dhammaadka Qeybta C.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.2 Aasaasidda Xaaladda



6.2.1 Guudmar

Ujeeddada tallaabadani waa in la xaddido diiradda/baaxadda dhammaan hawlaha maareynta khatarta. Tani waxaa ka mid ah deegaanka gudaha iyo dibadda oo ay khatartu ka dhacayso oo ah tu: istiraatiijiyeed, hawleed, dhaqaalo la xiriirta, tartameed, dhinacyada daneeya ururka, bulsheed, dhaqameed iyo tu sharciyeed.

6.2.2 Xaqiiji Ujeeddooyinka Ururka

Maadaama khatartu tahay 'saameynta hubaal la'aantu ku leedahay ujeeddooyinka', ma billaabi kartid qiimeynta khatarta ilaa aad ka ogaato ujeeddooyinka dhabta ah ee ururkaaga. Tallaabada koowaad waa in aad xaqiijiso ujeeddooyinkaas. Ujeedooyinka waa la aasaasi doonaa iyagoo qeyb ka ah qorshahaaga shaqo ama hannaanka qorsheynta ee ururkaaga.

Tusaalooyin ku saabsan ujeeddooyinka urureed

- Xaqiiji natiijooyinka adeegga 'A' marka sanadku dhamaanayo.
- Adeegga 'B' maalgelin uga soo hel QM marka sanadku dhamaanayo.
- Adeegga 'C' maalgelin uga soo hel deeqbixiyeyaasha marka sanadku dhamaanayo.
- Sanadkiiba heerka shaqo ka tegista shaqaalaha yaree ilaa 'D'.
- Hoos u dhig cabashooyinka macaamiisha (ama natiijooyinka xun/taban)ilaa 'E' marka sanadku dhamaanayo.

Waxaa ugu sii muhiimsan, in ujeeddooyinku sanad ilaa sanad kale ay is beddeli karaan mar walba oo ururku sii horumaro. Waxay kaloo isku beddeli karaan iyagoo ka jawaab celinaya fursadaha iyo horumarka ka dhacaya deegaanka uu ku shaqeeyo oo ururka bannaanka ka ah. Ujeeddooyinkaasi waxay gacan ka geysanayaan diirad saaridda tallaabada xigta ee hannaanka taas oo aad ku xaddidi doonto khataraha saameynta taban/xun ku yeelan kara ujeeddooyinkaaga.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.2.3 Aqoonso Dhinacyada Daneeya Ururkaaga

Qeyb ka mid ah xaaladda khatarta waa dhinacyada daneeya ururkaaga – waa qolyaha uu ururkaagu la tashado, xiriirka la sameeyo uuna la falgalo.

Dhinaca Daneeya	Waa qof ama urur kaas oo saameyn kara, ku saamoobi kara, ama isu arka in go'aan ama shaqo uu saameynayo iyaga.

Jadwalka soo socda wuxuu tilmaan ka bixinayaa liiska dhinacyada daneeya NGO-yada ee tusaalaha noqon kara.

Dhinacyada Daneeya NGO-yad ee Tusaalaha ah

- Xubnaha Guddiga
- Xubnaha shaqaalaha
- Mutadawiciinta
- Macaamiil/ka faa'iideysteyaal
- Dhinac uu NGO-gu alaabo ka soo qaato
- Maal-geliyeyaal
- Dhinac shirko la ah NGO-ga
- Deeqbixiyeyaal
- Hey'adaha dowladda
- Xubnaha/wakiillada bulshada
- Dhinac wada-shaqayn kala dhaxeyso NGO-ga

Abuuridda liiska dhinacyada daneeyda NGO-ga wuxuu si guud gacan ka geysanayaa:

- In la garto qolyaha u baahan in laga qeybgeliyo aqoonsashada, falanqeynta, qiimeynta iyo la tacaalidda khatarta;
- xaddiditaanka yey tahay in warbixin laga siiyo khatarta, iyo yey tahay in lagala tashado arrimaha khatarta quseeya; iyo
- wargelinta hannaankaaga wada tashiga iyo wada-xiriirka ee joogta iyo aasaasiga.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.3 Aqoonsashada Khatarta



6.3.1 Guudmar

Ujeeddada tallaabadani waa in aad aqoonsataa dhamaan khataraha uu ururkaagu wajihi karo ama kuwa ka dhalan kara shaqooyinkaaga oo dadka kale ay ku saamoobi karaan. Tallaabadani waxaa ku jira aqoonsashada ilaha iyo sababaha khataraha, cawaaqibtooda iyo meelaha ay saameynta ku yeelan karaan iyo tallaabooyin khatarta lagu maareeyo oo horay u jiray.

Mar walba oo aad horay u sii gasho tallaabadan, ururi macluumaad oo geli Diiwaankaaga Khatarta (waxaa loo arbuuray asoo qeyb ka ah Heykalka Maareynta Khatarta). Ugu danbeyntii, waxaad heysan doontaa faham ballaaran oo ku saabsan liiska khataraha iyo tallaabooyinka lagula tacaalo.

Waa muhiim in dhamaan khataraha dhici kara la xaddido inta tallaabadan lagu gudo jiro. Khatar walba oo halkan lagu fududeysta laguma qaban kari doono falanqeynta xigta ee marxalada qiimeynta.

Tallaabadan waxaa ku jira saddex shaqo:

- Aqoonso qeybaha khatarta
- Aqoonso khataraha
- Aqoonso tallaabooyinka jira ee lagula tacaalo khataraha

6.3.2 Aqoonso khataraha

Si loo helo meel laga ambaqaado, waa in aad diiradda saartaa aqoonsashada khataraha saameynta xun ku yeelan kara ujeeddooyinka hawlaha aad xoogga saareyso. Tani waxay kaloo kaa caawin kartaa in ay daaha ka rogto saddexda qeyb ee ballaaran ee khataraha ah oo NGO-yadu wajahaan;

1. Khatar Xaaladeed: waa khataraha bannaanka ee ka baxsan xakamaynta ama awoodda NGO-yada (sida musuubooyinka dabiiciga, falalka argagixiso, xasilloonidarrida siyaasadeed, maqnaanshaha kaabayaasha dhaqaale ee dowladeed).

2. Khatar Mashruuceed: waa khataraha la xiriira sida mashruuc ama barnaamij loo naqshadeeyo oo loo fuliyo, taas oo ay ka dhalan karto in la dabooli waayo baahyaha ka faa'iideystayaasha iyo/ama waxyeello dhici karta (sida mashruuca oo la marin habaabiyo, awood la'aan, tayo-xumo ku saabsan bixinta adeegga).

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

3. Khatar Urureed: waa khataraha ururka dhexdiisa ka jira, kuwaas oo saameyn kara ammaanka iyo nabadgelyada shaqaalaha iyo/ ama sumcadda ururka (sida nidaamka maamulidda dhaqaalaha, dadka iyo hantida).

Waxaad kaloo rabi kartaa in aad si qoto dheer ah u baartid qeybaha ballaaran iyo qeybaha cayiman ee khatarta kuwaas oo la abuuray iyagoo qeyb ka ah heykalkaaga.

Xaaladeed	Mashruuceed	Urureed
Musiibooyin dabiici ah Falal argaggixiso Xasilloonidarri siyaasadeed Maqnaanshada kaabayaal dhaqaale Musuqmaasuq	Marinhabaabin Adeeg bixin liidata Mashruuca iyo/ama hannaanka kormeeridda tayada oon loo hoggaansamin	Shaqo ka tagis ba'an Maareyn dhaqaale Maareynta dadka iyo dhaqaalaha Awood la'aan Wax is-dabamarin

Marka aad ogaato qeybta khatarta ee saameyn ku yeelan karta hawlahaaga, 'weyneyso' ayaad saari kartaa si aad u aqoonsato khataro gaar ah oo qeyb kasta ka mid ah. Waxaad heli doontaa natiijo ka kooban liiska jadwalka hoose, kaas oo aad gelin karto khaanadda Tilmaan Khatar ee Diiwaankaaga Khatarta.

Tusaalooyin ku Saabsan Tilmaamaha Khatarta

Qeybta Khatarta	**Tilmaanta Khatarta**
U hoggaansanaan/ qaanuunka la xiriira	In loo hoggaansami waayo nidaamka taas oo ay ka dhalan karto in la waayo kalsoonida deeqbixiye
Sharciyeed / ganacsiyeed	In la jebiyo heshiis taas oo ay ka dhalan karto ganaax ama dacwo maxkamadeed
Siyaasadeed/ dhaqaaleed	Is beddel ku yimaada nidaamka siyaasadeed taas oo ay ka dhalan karto in la waayo maalgelin
Dhaqaaleed/ maalgelin	Ilaha dhaqaale ee ururka oo si xun loo maamula taas oo sababi karta dhaqaale luma
Maamul	Nidaam maamul oo aad u liita kaas oo sababi kara wax soo saar xumo daran
Howleed	Fashil ku yimaada nidaamka qeybinta howl maalmeedka shaqaalaha taas oo sababi karta wax soo saar xumo
Bixin adeeg	Hoos u dhac ku yimaada tayada adeeg bixinta taas oo sumcad xumi sababi karta
Caafimaadka shaqada iyo badbaadada	Shaqaalaha oo raaci waaya nidaamka nabadgalyada iyo caafimaadka taas oo dhalin karta dhaawacyo iyo shilal
Xooga shaqaalaha	In la waayo dhaqaale/shaqaale kaafi ah taas oo sababi karta daah ku yimaada mashaariicda ama sumcad lunta
Dhinacyada daneeya (macaamiil/ qolyo NGO-gu uu alaabo ka qaato)	Dhinacyada uu NGO-gu ka soo qaato alaabaha oo la siin waayo lacagahooda taas oo saameyn xun ku yeelata adeeg bixinta ururka
IT / Maareynta macluumaadka	In la raaci waayo nidaam fiican oo IT ah taas oo ay ka dhalato lumitaanka diiwaanno dijitaal ah ama sumcad ama lumitaanka wax soo saarka
Ammaan	In la jebiyo ama la raaci waayo hannaanka nabadgelyada oo ay ka dhalato xatooyo ama alaab lunta
Sumcadeed	Dareen warbaahin oo gurracan iyo/ama walaac bulshada maxalliga oo aad u sarreeya

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Uma baahnid inaad ku buuxisid qayb walba khatar. Qaybaha qaar waa ay banaanaan karaan. Sidoo kale, tirada khataraha ee qayb walba waxaa suurogal ah iney is bedelaan muddo kadib.

6.3.3 Sida Loo Aqoonsado Khataraha

Waxaa jira habab fara badan oo ururkaagu arrinta ku samayn kara. Tusaale ahaan:

- in si hal-hal ah loo wareysto maamuleyaasha ama shaqaalaha ku shaqada leh ee ururka; iyo
- in shaqaalaha iyo maamuleyaasha ku shaqada leh loo qabto aqoon is weydaarsi, taas oo uu fududeynayo Isku-duwaha Maareynta Khatarta (ama sarkaal kale oo ku shaqo leh).

Ogow: Waa muhiim in aad ka qeybgeliso shaqaalaha hoose kuwaas oo shaqooyin kala duwan aqoon u lahaan karaan in ka badan maamuleyaasha sarsare oo shaqooyinka gacanta ka fog.

Wareysiyo

Haddii farsamada wareysiga la doorbidayo, fiiro gaar ah u lahow in aad adeegsato Foomka Aqoonsashada Khatarta si aad ugu diiwaangeliso macluumaadka la helay (fiiri tusaalaha ku yaalla jadwalka hoose). Hubi in la-wareysteyaashu ay ka mid yihiin dadka masuulka ka ah hannaannada ururka iyo natiijooyinkiisa ee qeyb walba oo ah khatarta la aqoonsaday horayna ugu sii dir foomam si dadka la wareysanayo ay khataraha fiiro ugu yeeshaan.

Tusaalaha Foomka Aqoonsashada Khatarta

Taariikh:		Tixraac:	

Qeybta Khatarta:		Masuuliyad Shakhsiyadeed:	

Tilmaanta Khatarta:	

Qodobbada ka Qeybqaadanaya (Sababaha)	Natiijooyinka (Cawaaqibta)

Tallaabooyin (Xakameyn)

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Aqoon Is-weydaarsiyo

Haddii habka aqoon is-wedaarsiga la sameeyo, u adeegso qeybaha khatarta la aqoonsaday qaab heykal si looga doodo. Marka aad si wanaagsan u isticmaasho liiskaaga qeybaha khatarta wuxuu kaa caawin doonaa in doodda si habsami leh loo qabto oo aan waxba laga tegin.

Dooro hab (habab) khataraha lagu aqoonsado oo ku habboon ururkaaga. Wareysiyada iyo aqoon is-weydaarisayadu kaliya ma aha hababka ugu fiican.

Adeegso Farsamada 'Sabab-Saameyn'

Waxaa sidoo kale jira farsamooyin dhowr ah oo khataraha lagu garto. Tan caanka ah waa farsamada sabab-saameyn. Tani waxay la xiriirtaa laba su'aalood:

- Qeybtan uruka ka mid ah maxaa ka qaldami kara? (saameynta la fili karo)
- Maxay u dhici kartaa? (sababta la fili karo)

Xusuusnow in 'sababtu' ka koobnaan karto dhowr qodob oo saameyn leh. In la garto dhowrka qodob ee saameynta leh waxay tilmaan dheeri ah ka bixineysaa khataro kale iyo saameynta ay yeelan karaan. .

Dhacdooyinkii Hore iyo Marxaladda Taagan

Waxaa kaloo mudan in dib-u-eegis lagu sameeyo haddii ay jiraan dhacdooyin hore iyo marxaladaha taagan (sida arrimuhu yihiin).

6.3.4 Sida Loo Tilmaamo Khataraha ('Oraahyada Khatarta')

Khatar, sida lagu qeexayba, waa waxyaaba dhici kara; waa wax suurtagal ah oon la hubin. Haddaba dhacda kasta, xaalad ama fal dhacaya, ma ahan khatar ee waa xaalad la yaqaanno. Sidaa daraaddeed, luuqadda aad u adeegsaneyso in aad ku tilmaanto khataraha waa in ay tilmaan ka bixisaa qodobka suurtagalnimada ama hubaal la'aanta. Oraahda khatarta waa in loo adeegsadaa sida ereyada 'waxaa la arkaa', 'waxaa dhici kara', 'waxaa laga yaabaa'. Oraah khatar ee dhahaysa wax ayaa dhici doona, ma aha tu tilmaan ka bixineysa khatar sinnaba.

Tusaalooyinka oraahyada khatar ee la aqballi karo

- 'In si xun loo maamulo ilaha dhaqaale ee ururka taas oo sababi karta dhaqaale luma'
- 'In si wanaagsan loogu hoggaansami waayo nidaamka taas oo ay ka dhalan karto kalsoonida deeqbixiyeha oo la waayo'

- 'In si xun loo maamulo ilaha dhaqaale ee ururka taas oo sababi karta dhaqaale luma'
- 'In si wanaagsan loogu hoggaansami waayo nidaamka taas oo ay ka dhalan karto kalsoonida deeqbixiyeha oo la waayo'

6.3.5 Aqoonso Tallaabooyinka Maareynta Khatarta ee Jira

Badanaa ururku wuu leeyahay tallaabooyin howleed ama cabbirro gacan ka geysta maareynta khatarta. Waa muhiim in kuwaas la aqoonsado/xaddido. Maxaa yeelay sida caadiga ah tallaabooyinkaasi xisaabta ayaad ku darsan doontaa marka ay timaado in khatarta la qiimeeyo. Tusaale ahaan, heerka saameynta khatar uu ku yeelan karo Shaqada, Caafimaadka iyo Badbaadada (SHCB) wuu yaraanayaa hadduu ururku leeyahay siyaasado iyo hannaanno SHCB.

Ku diiwaangeli Khaanadda Tallaabooyinka ee Diiwaanka Khatarta tallaaba kasta ee maareynta khatarta oo aad aqoonsato.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Tusaalooyin ku Saabsan Tallaabooyinka Howleed & Maamuleed

- Siyaasado
- Habab
- Tilmaanbixiyeha shaqada
- Hubin gudeed
- Warbixin-siin
- Nidaamka maareynta dhaqaalha & shaqaalaha
- Siyaasadaha shaqaaleysiinta
- Heshiiska adeegsiga shabakadda IT-da
- Nidaamka maareynta SHCB
- Kulammo
- Hannaanka wargelinta
- Miisaaniyad dejin
- Hannaanka qorsheynta istiraatiijiyada

Dukumiintigani waa uun hagid. Waxaad u baahan doontaa in aad diyaarsato liiska tallaabooyinka maareynta khatarta ee ku habboon ururkaaga.

6.4 Falanqeynta Khatarta



Ka dib marka aad aqoonsatahay khataraha ku imaan kara ururkaaga, hadda waxaad u baahan tahay in aad xaddiddo suurtagalnimada ay khatar walba ku dhici karto, cawaaqibta dhici karta iyo astaamaha ay yeelan karto khatarta taas oo macluumaad wax ku ool ah u noqoneysa danaha falanqeynta.

Marxaladuhu waa:

- Qiimee cawaaqibta iyo suurtagalnimada khatar kasta
- Xaddid heerka guud ee khatar kasta
- Abuur gal khatareed
- U xilsaar khatar kasta maareeye

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.4.1 Qiimee Suurtagalnimada iyo Cawaaqibta

Waad qiimeyn kartaa suurtagalnimada khatar kasta adiga oo adeegsanaya jadwalka heerarka suurtagalnimada ee loo sameeyay heykalkaaga.

Heerka Suurtagalnimada	Tusaalooyin Tilmaan Bixinaya	Tusaalooyinka Ixtimaalka (Saadaasha)
Aan Suurtagal Ahayn	• Kaliya dhici kara xaalado khaas ah. • Soo noqnoqosho caadi ah 500 ee sanaba hal mar ama ka badan. • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >0.005% (20,000-kii jeerba hal mar)	<20%
Aan Macquul Ahayn	• Lama filayo in ay dhacdo. • Lagama hayo dhacdooyin ama caddeymo la diiwaangeliyay. • Fursad ama sabab ay ku dhacdo ay aad u yar tahay. • Soo noqnoqosho caadi ah 100-kii sanaba hal mar. • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >0.05% (2,000-kii jeerba hal mar)	>20% - 40%
Suurtagal Ah	• Dhici karta mararka qaar. • Leh dhacdooyin iyo caddaymo diiwaangashan oo aad u yar ama dhif ah. • Leh sabab ama fursad ay ku dhici karto. • Soo noqnoqosho caadi ah 20-kii sanaba hal jeer. • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >0.5% (200-kii jeerba hal mar)	>40% - 60%
Macquul Ah	• Macquul ah in ay dhacdo/soo noqnoqota. • Leh caddeyn xoog leh iyo dhacdooyin la diiwaangeliyay oo joogto ah. • Dhici kari doonta xaalado badan dhexdooda. • Soo noqnoqosho caadi ah 5/7 sanaba mar • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >5% (20-kii jeerba hal mar)	>60% - 80%
Aad Macquul U Ah	• Macquul ah in ay dhacdo/soo noqnoqota. • Leh caddeyn xoog leh iyo dhacdooyin la diiwaangeliyay oo heerkoodu uu aad u sarreeya • Soo noqnoqosho caadi ah 5-tii sanaba ama ka yar. • Suurtagalnimo ka badan 5 sano: >50% (2-dii jeerba hal mar)	>80% - 100%

Waad qiimeyn kartaa cawaaqibta khatar kasta adiga oo adeegsanaya jadwalka heerarka cawaaqibta ee loo sameeyay heykalkaaga. Jadwalka hoose laba qeybood ayuu tusaale ka bixinayaa.

Heerka Cawaaqibta	**Caafimaad iyo Badbaado**	**Sumcad**
Aan Muhiim Ahayn	Shilalka yaryar uma baahna gargaar degdeg ah	Mucaaradnimo maxalli ah oo ku aaddan dareenka dadweynaha ama cabashooyin
Aan Darneyn	Gargaar degdeg ah waa loo baahan yahay	Dareen warbaahin oo gurracan iyo/ama walaac bulshada maxalliga oo aad u sarreeya
Dhexdhexaad	Halis ah laakin ay ka dhalan karto naafo laga soo kabsan karo oo u baahan in isbitaal wax looga qabto	Dareen warbaahin oo gurracan oo aad u sarreeya ama aan muhiim ahayn.
Weyn	Halis weyn ah balse ay ka dhalan karto naafo laga soo kabsan karo oo u baahan in isbitaal lagu daweeyo	Gadood dadweyne ama warbaahin oo aad u sarreeya (faaqidaad maxalli ah)
Aad u Daran	Qof ama dad dhimasha u keeni karta ama xanuun naafa sababa ama aad u daran oo ay ka dhalan karto naafo aan laga kabsan karin (>30%)	Gadood dadweyne ama warbaahin socda (faaqideed heer qaran ama gobol)

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Marka loo eego nooca khatarta, waxaa laga yaabaa in aad rabto falanqeynta xog taariikheedka dhacdooyinka isku eg, oo aad u barbardhigto dhacdooyin kale oo/ama qof khabiir ah saadaalintiisa aad raadsato.

6.4.2 Xaddid heerka guud ee khatarta

Marka aad qiimeyso heerka suurtagalnimada iyo cawaaqibta khatar kasta, waxaad qiimeyn kartaa heerka guud ee khatarta adiga oo adeegsanaya shaxda khatarta oo qeyb ka ah heykalka.



Ka billow heerka suurtagalnimada ka dib u gudub heerka cawaaqibta adiga oo xaddidaya heerka guud ee khatarta.

Daran	
Sare	
Dhexdhexaad	
Hoose	

Tusaale ahaan: haddii dhicitaanka khatar uu yahay mid aan ‘macquul ahayn’ iyo ‘dhexdhexaad, heerka khatartu wuxuu noqonayaa dhexdhexaad.

Xusuusnow in khatar daran uu heerkoodu ‘hooseyn’ karo maadaama tallaabooyin wax ku ool ah lagula tacaalay.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO’yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.4.3 Abuur Gal Khatar

Ururkaaga waxaad u abuuri kartaa gal khatar adiga oo dhamaan khataraha ku calaamadeynaya shaxda khatarta.



Tani waxay u baahan tahay xoogaa waqti ah, saa daraaddeed waad iska deyn kartaa in aad sameyso. Hayeeshee, abuuridda gal khatar ka dibna loo barbardhigo dib-u-eegista khataraha ee la sameeyay ka gadaal markii la abuuray qorshooyinka la tacaalidda khatarta, waxay noqon kartaa hab wanaagsan oo lagu muujiyo wax ku oolnimada howlaha maareynta khatarta. Hadhow macluumaadkan waxaa la siin karaa dhinacyada daneeya ururka sida Guddiga.

6.4.4 Magacaw Maareeye Khatar

Marka khatar walba la qiimeynayo, khatarta u xilsaar qof maareeya oo hadhow masuul ka ah la tacaaliddeeda. Maareeyeyaasha khatarta aalaaba waxay noqdaan maamuleyaasha sarsare ama shaqaale leh awood uu ku maareeyo khataraha dhaqaalana ugu qoondeeyo shaqooyinka la tacaalidda khatarta.

In qof loo xilsaaro la tacaalidda khataruhu waa qodob muhiim ah oo tilmaan ka bixinaya sida maareynta khatarta loogu dhafo maamulka ururka. Qof u xilsaaridda khatartu waxay hagaajineysaa isla-xisaabtanka maareynta khatarta si la aqbali karo ama sax ah marka laga hadlayo heerarka xammilitaanka iyo kordhin khatar aan loo arkin tu la aqbali karo.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.5 Qiimeynta Khatarta



6.5.1 Guudmar

Danta laga leeyahay tallaabadani waa in liis lagu tixaa khataraha si ku dhisan mudnaanta wax looga qabanayo. Liisku wuxuu muujin doonaa khataraha u baahan in lala tacaalo iyo kuwa aan u baahneyn; iyo kuwa hadda raba in wax laga qabto oo ah kuwa ugu degdegta badan. Waxaa jira laba marxaladood:

- Qiimee khataraha
- Xaddid in khataraha la heysanayo ama la kordhinayo

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.5.2 Qiimee Khataraha

Si loo qiimeeyo khatar, heerkeeda guud ee khatarta u barbardhig khatar isku biimeynta iyo khatar xammilidda ururka. Taasina waa meesha uu kaaga soo baxayo galkaaga khatarta oo diyaar ah.



Ururkaagu xammilaad yar miyuu u hayaa khataraha heerkoodu sarreeyo? Haddii ay sidaa tahay, galkaagu wuxuu muujin karaa haddii aad heysato khataro noocan ah ama aadan heysan.

Daran	
Sare	
Dhexdhexaad	
Hoose	

Haddii ururkaagu uu isku biimeyn karo khataro heerkoodu sarreeyo balse marka ay khataruhu ka culees bataan faa'iidooyinka la raadinayo qiimeyntaadu waxay u baahnaan doontaa in si dhab ah loogu fiirsado haddii ay faa'iidooyinkaas ka badnaan karaan khataraha iyo in kale. Kanina waa go'aan ay tahay in urur walbaahi uu si taxaddar leh uga fiirsado.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.5.3 Kordhi ama Heyso Khataraha

Halkaa marka ay marayso, waa inaad tixraacdaa tallaabiyinka ku xusan heykalka oo ku saabsan la tacaalida khatarta kororta (eeg tusaalaha hoose).

Tusaalooyin ku Saabsan Tilmaamaha Kordhinta iyo Heysashada Khataraha

Heerka Khatarta	Tilmaamaha Heysashada iyo Kordhinta Khataraha
Daran	U Wareeji Guddiga, khataraha noocan ah caadiyan lama aqbalo lamana haysto.
Sare	U wareeji Madaxa Hay'adda, khataraha noocan ah caadiyan lama aqbalo lamana haysto.
Dhexdhexaad	U wareeji sarkaal sare oo shaqo ku leh ama maamule darajadiisu sarreyso, xaddid tallaabooyinka maareynta khatarta, khataraha noocan ah waa la heysan karaa ama waxaa lagu maareyn karaa heer fulineed.
Hoos	Wargeli sarkaalka ay quseyso ama heer fulineed si loo maareeyo, khataraha noocan ah badanaa waa la heystaa.

6.6 La-tacaalidda Khatarta



6.6.1 Guudmar

Ujeeddada tallaabadani waa in la aqoonsadaa lana fuliyaa habka ugu habboon ee lagu yareyn karo khataro loo arkay heerkooda in aan la aqbali karin. Hababkan khatarta lagula tacaalayo, hubaashii, waxay noqonayaan tallaabooyin cusub oo khatarta lagu maareeyo ama kuwo jira ayay sii kordhinayaan.

Waxaa jira afar tallaabo

- Aqoonso khiyaaraadka la tacaalidda khatarta
- Dooro khiyaarka ugu habboon ee la tacaalidda khatarta
- Abuur qorshooyin la tacaalidda khatarta
- Fuli oo guudmar ku samee la tacaalidda khatarta

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.6.2 Aqoonso Khiyaaraadka La Tacaalidda Khatarta

Marka la aqoonsanayo khiyaaraadka/fursadaha la tacaalidda khatarta, waa in aad tilmaamaha (hagaha) guud dib ugu laabataa kaas oo aad ka heli karto heykalkaaga (fiiri tusaalaha hoose)

Tusaalaha Tilmaamaha Kordhinta iyo Heysashada

Heerka Khatarta	Tilmaamaha La Tacaalidda Khatarta
Daran	Waxay u baahan tahay wax ka qabasho degdeg ah si loo maareeyo khatarta ama loo yareeyo waxyeelladeeda
Sare	Waxay u baahan tahay in la sameeyo falanqeyn dhib/dheef si loo qiimeeyo heerka ay tahay in lala tacaalo khatarta – la kormeero si loo hubiyo in khatartu aynaan saameyn xun yeelan muddo ka dib
Dhexdhexaad	Waxay u baahan tahay kormeer joogta ah si loo hubiyo in waxyeellada khatarta la maareeyay, dhibaatadeeda la yareeyay oo natiijooyinkeedana la kormeeray
Hoose	Waxaa ku filan maareynteeda hannaanka gudaha iyo kormeerrada joogtada ah.

Ka dib waxaad raadisaa khiyaaraad/fursado khatarta lagula tacaalo oo ay kuwani ku jiraan:

- in laga fogaado khatarta iyadoo la iska dhaafayo howsha khatarta kordhin karta, ama in isbeddel lagu sameeyo sida howsha loo qabanayo.;
- baabi'inta isha ama sababta khatarta;
- hoos u dhigidda suurtagalnimada ay khatarta ku dhici karto;
- Xiddiditaanka ama yareynta cawaaqibta khatar dhacday;
- Khatarta oo lala wadaago dhinac ama dhinacyo/qolyo kale (sida hey'ado ceymis ama kuwo heshiisyo lala galo); ama
- in khatarta la heysto iyadoo loo cuskanayo go'aanno si fiican loo darsay iyo oggolaanshaha Guddiga ururka ama maamul sare.

Kuwani kaliya waa uun qaar khiyaaraad ah. Qasab ma ahan in ay noqdaan kuwa ugu saxsan. Waxaa laga yaabaa in ay xaalad kasta ku habbooneyn.

6.6.3 Dooro Ikhtiyaarka (Ikhtiyaarada) Ugu Haboon ee La-tacaalidda Khatarta

In la doorto khiyaarka/habka ugu habboon ee la tacaalidda khatarta, waxay kaaga baahan tahay in aad isku miisaanto qarashka fulinta howlahala tacaalidda iyo faa'iidada ay keeni karto. Arrimaha ay tahay in fiiro gaar ah loo yeesho waxaa ka mid ah:

- lacagta iyo dhaqaalaha loo baahan yahay si loo fuliyo hawsha la tacaalidda;
- macquulnimada (uu waqitiguna ku jiro) lagu fulin karo howsha la tacaalidda;
- sida la tacaaliddu ay wax ku ool u tahay si ay u yareyso ama u baabi'iso khataraha;
- saameynta ay la tacaaliddu ku yeelan karto dhinacyada daneeya ururka, qiyamka aragtiyooyinka iyo danaha – hawlaha la tacaalidda qaarkood ayaa dhinacyada daneeya ururka u cuntami kara halka kuwo kalane aynaan u cuntami karin;
- Haddii xalku uu ku dhacayo ama si uga hor imaanayo qaanuun, sharci ama waajibaad ururkaaga u degsan;

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

- cawaaqib aan loo qasdin oo xalku yeesho – xalalka khatartu laftooda waxay saameyn karaan khataro kale oo jira, ama waxay soo saari karaan khataro cusub (oo loo yaqaanno khataraha darajda labaad);
- guuldarrada in si wax ku ool leh khatarta loola tacaali waayo lafteeda ayaa khatar ah. Ururradu waxa ay badanaa ka faa'iideystaan adeegsiga laba haboo la isu geeyay.

6.6.4 Abuur Qorshooyin Lagula Tacaalo Khatarta

Qorshooyinka la tacaalidda khatartu waa halka aad ku diiwaangelineyso sida habka/hababka xalka aad dooratay loo fulin lahaa. Qorshooyinkan waa in lagala doodo dhinacyada ururka daneeya waana in la waafajiyaa hannaanka ururkaaga.

Nooca macluumaadka ay tahay in lagu daro qorshaha la tacaalidda khatarta jadwalka hoose ayaa lagu muujiyay.

Tusaalaha Qorshaha La Tacaalidda Khatarta

Lam. Khatarta:	5	Lam.Tix.Qorshaha:	1	Taariikhda la Diiwaangeliyay:	Juun 2012
Waxaa uruuriyay:		Kormeeraha Dhaqaalaha		Mudnaan H/M/L:	H
Qorshaha La Tacaalidda Waxaa Leh:		Kormeeraha Dhaqaalaha		Taariikhd Bartilmaameedka ah:	Sabteembar 2012
Dib-u-eege:		Agaasimaha Guud		Taariikhda Dib-u-eegista:	Julaayo 2012
Tilmaanta Khatarta:		In lagu guuldarreysto in si hagaagsan warbixin loo siin waayo nidaam hayaha taas oo ka dhalan karta ganaax ama ciqaab			
Qorshaha La Tacaalidda:		Dib u eeg oo xooji nidaamka warbixin siinta kuna soo dar hannaanka hubin.			
Ujeeddada/Ujeeddooyinka Qorshaha La Tacaalidda:		In la yareeyo halista ganaaxa iyo ciqaabaha oo ka imaan karta khatarta ah in waqtigii loogu talogalay warbixin la siin waayo cidda ay quseyso.			
1 Qeybaha la soo jeediyay:		• Dib u eeg hannaannada jira • Dib u eeg hababka warbixin-siinta • Samee qabyo-qoraal hannaanka lagu beddelo • Hel oggolaanshaha Agaasimaha Guud ee hannaanka dib u eegista lagu sameeyay • Fuli nidaamka cusub ee warbixin-siinta			
2 Dhaqaalaha loo baahan yahay:		• Waqti (qiyaas ahaan 15 maalin shaqo) • Looma baahna dhaqaalo/waqti dheeri ah – qeyb ka mid ah waqtiga maamulka			
3 Waajibaadka:		Kormeeraha Dhaqaale ha u war bixiyo Agaasimaha Guud			
4 Waqtiga fulinta:		Saddex bil			
5 Shuruudaha kormeerka (sida toddobaadle/bille):		Kormeer ku samee qorshaha maareynta khatarta bishiiba mar oo qeyb ka ah hannaanka jira ee maamulka			

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Ugu yaraan, macluumaadka soo socda waa loo baahan yahay:

- magaca qorshaha la tacaalidda;
- qorshaha waxaa loogu talogalay in uu yareeyo khatarta (khataraha);
- ujeeddooyinka qorshaha;
- tallaabooyinka wax qabad ee la soo jeediyay;
- magaca (magacyada) qofka (dadka) masuulka ka ah abuuridda iyo fulinta qorshaha;
- maareeyaha khatarta;
- dhaqaalaha loo baahan yahay oo uu ku jiro waqtiga, qarashaadka iyo waxyaabaha kale;
- halbeegyada waxqabadka iyo kormeeridda is beddelka ee la sameeyay (toddobaadle, bille ama saddexdii bilba mar); iyo
- waqtiga iyo jadwalka shaqada.

Waxaad rabi kartaa in aad ku darto macluumaad dheeri ah sida:

- mudnaanta qorshaha (oo la xiriira qorshooyin kale oo khatarta lagula tacaalo);
- khataraha heerka darajada labaad waxay ka soo ifbixi karaan la tacaalidda – khataraha noocan ah waa in fiiro gaar ah loo lahaadaa; iyo
- (haddii qorshaha la tacaalidda uu ku jiro wax ka badan hal khiyaar/hab) horsanaanta (sida ay u kala horreeyaan) ay tahay in khiyaaraadka qorshaha la tacaalidda loo kala qabto.

6.6.5 Fuli oo Guudmar ku Samee La-tacaalidda Khatarta

Fulinta maareynta khatartu waxay yeelan kartaa heerar kala duwan oo guul ah. Waxay yareyn kartaa khatarta, baabi'in kartaa khatarta oo dhan ama gebi ahaanba wax saameyn ah ma yeelan karto. Waxay kaloo sababi kartaa khataraha heerka darajada labaad. Saa daraaddeed waa muhiim in kormeer iyo guudmar lagu sameeyo xalalka khatarta lagula tacaalo.

Si kooban, fulinta iyo dib-u-eegista maareynta khatartu waa hannaan meerto ah (isku soo daba noqonaya):

- fulinta la tacaalidda khatarta;
- qiimeynta wax ku oolnimada la tacaalidda khatarta;
- go'aansashada haddii khatar hartay (oo loo yaqaanno haraaga khatarta) ay tahay tu la xammili karo;
- (haddii aan la xammili karin) fulinta qorsho cusub oo khatarta lagula tacaalo; iyo
- qiimeynta wax ku oolnimada la tacaalidda khatarta.

Marka la fuliyo howsha la tacaalidda khatarta, waa in aad dib u qiimeysaa oo aad dib u xisaabisaa khatarta, balse aad markaan isticmaashaa xalka la tijaabiyay. La tacaaliddu, haddii si kale loo dhigo, waxay noqotay tallaab cusub oo khatarta lagu maareeyo.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.7 Xiriir iyo Wadatashi (Hannaan Joogta ah)



6.7.1 Hordhac Guud

Marka aad ku gudojirto dhammaan tallaabooyinka Hannaanka Maareynta Khatarta waa in aad hubisaa in dhinacyada daneeya ururka ee munaasabka ah (gudo iyo dibadba) aad la tashataa ama/waxa socdana laga wargeliyaa. Haddaba waa in aad kol hore abuurtaa qorshooyin iyo habab aad shaqadan ku hirgeliso.

6.7.2 Qofta ay Tahay in La Wargeliyo/Lala Tashado

Tilmaan fiican oo ku saabsan cidda la wargelinayo /lala tashanayo, iyo nooca khataraha iyo maareynta khatarta ay tahay in la ogeysiiyo, waa liiska dhinacyada daneeya ururka oo lagu muujiyay Tallaabada 1aad ee Abuur Xaaladda.

Dhinacyada ururka daneeya ee ururka gudahiisa

Guddigu wuxuu u baahan yahay in si waafi ah xog looga siiyo natiijooyinka qiimeynta khatarta iyo dib-u-eegista khatarta. Si gaar ah, waa in warbixin laga siiyaa khataraha ka sarreeya heer la aqbali karo ama la xammili karo.

Badanaa maamulka sare ama saraakiisha waxay lug ku leeyihiin aqoonsashada, qiimeynta iyo maareynta khataraha, saa daraaddeed waa in iyagana lala tashadaa. Si gaar ah, hubi in dadka masuulka ka ah hannaanka urureed iyo natiijooyinkiisa qeyb kasta oo khatar ah iyagana lala tashado. La tashiga waxaa lagu sameyn karaa wareysi qof-qof ah, aqoon is-weydaarsi koox ah ama habab kale.

Shaqaaluhu waa in iyagana laga wargeliyaa natiijooyinka qiimeynta khatarta iyo dib-u-eegista khatarta si ay khataraha ugu maareeyaan si haboon oo waafaqsan siyaasadda maareynta khatarta. .

Dhinacyada ururka daneeya ee ururka dibaddiisa

Waxaa laga yaabaa in ay jiri karaan macluumaad lagaa doonayo in aad siiso dhinacyo ururka daneeya oo ururka bannaankiisa ah adiga oo u hoggaansamayo shuruuc dowli ah. Intaa waxaa dheer, waa in aad si taxaddar leh uga fakartaa waxa aad dooranayso in aad warxibin ahaan u bixiso. Tusaale ahaan, ma aha wax dhici kara in aad warbixin ka siiso qolyo aad badeeco/alaab ka soo qaadato khataro shakhsiyadeed ama Diiwaankaaga Khatarta. Si kastaba ha ahaatee, waxaad go'aansan kartaa in aad ku wargeliso in aad leedahay Siyaasadda iyo Heykalka Maareynta Khatarta oo aad khataraha ku maareyso, maxaa yeelay macluumaadkan wuxuu

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

gacan ka geysan karaa in shuruudo munaasab ah lagu wada xaajoodo marka adeeg ama alaab la is dhaafsanayo.

6.7.3 Wada-Xiriir

Wada xiriir wax ku ool ah (tusaale ahaan warbixinno) wuxuu hubin doonaa in dadka masuulka ka ah fulinta Hannaanka, iyo dhinacyada kale ee daneeya ururka ee shaqadu quseyso, ay fahmaan waxa go'aammada lagu saleeyay iyo sababaha tallaabooyin gaar ah loogu baahan yahay in la qaado. Wuxuu kaloo gacan ka geysanayaa xoojinta isla-xisaabtanka iyo maareynta khatarta.

6.7.4 Wadatashi

Hab wada xaajood wax ku ool ah wuxuu dhalinayaa natiijooyin badan oo guul leh isaga oo maamuleyaasha iyo shaqaalaha gacan ku siinaya in ay la fal galaan Hannaanka Maareynta Khatarta iyo in hannaanka maareynta khatartu ku dhafmo ururka. Tusaale ahaan, wada xaajoodku wuxuu:

- gacan ka geysanayaa in xaaladda si habboon loo aasaaso,
- hubinayaa in danaha dhinacyada daneeya ururka la fahmay oo la tixgeliyo,
- gacan ka geysanayaa hubinta in qeybaha khatarta iyo khataraha si waafi ah loo aqoonsaday/xaddiday,
- isu keenayaa dad khibrad ku leh qeybo kala duwan si khataraha loo falanqeeyo'
- hubinayaa in aragtiyo kala duwan tixgelin la siiyo marka khatarta la qeexayo iyo marka khatarta la qiimeynayo,
- dammaanad qaadayaa ayidaadda iyo taageeridda qorshooyinka khatar la tacaalidda,
- Xoojinayaa is beddel maamul oo habboon marka lagu gudojiro Hannaanka Maareynta Khatarta,
- abuurayaa qorsho wada xiriir oo gudo iyo dibad leh.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

6.8 Kormeer iyo Dib-u Eegid (Hannaan Joogta ah)



6.8.1 Hordhac Guud

Maareynta khatartu waa in ay jawaab degdeg ah ka bixisaa is beddelka – gaar ahaan kan ka jira ururka dhexdiisa iyo deegaankiisa dibadda ah. Haddaba, howlaha kormeerka iyo guudmarka/dib-u-eegista waa in ay ahaadaan kuwo joogta ah, iyo in ay ahaadaan kuwo ku waafaqsan tallaabo walba oo ka mid ah Hannaaka Maareynta Khatarta.

6.8.2 Aasaas Habab Kormeer

Marka aad kormeereyso khataraha, tallaabooyinka iyo qorshooyinka la tacaalidda khataraha, waxaad hubin kartaa in khatartii loo maareeyay si waafaqsan Siyaasadda iyo Heykalka ururka. Waxaad kaloo xaddidi kartaa wax ku oolnimada (saameynta, faa'iidooyinka iyo khasaaraha) istiraatiijiyadaada maareynta khatarta. Saa daraaddeed kormeerku wuxuu qeyb ka yahay hannaanka horumarinta ee joogtada ah wuxuuna xoojin doonaa ama kor u qaadi doonaa qiimaha ururka.

6.8.3 Aasaas Habab Warbixin-siin iyo Guudmar

Marka laga yimaado qabashada hawlo kormeerid oo joogta ah, waxaan kugula talineynaa in aad aasaasto habab warbixin-siin iyo guudmar oo rasmi ah. Hababkan waxay shardi u yihiin maamul wanaagga, waxay maamulka warbixinno cusub ka siinayaan khataraha, qorshooyinka la tacaalidda khatarta iyo arrin walba oo soo cusboonaata, waxay kaloo Guddiga u hubinayaan in khataraha loola tacaalay si waafaqsan Heykalka iyo Siyaasadda Maareynta Khatarta.

Hababka rasmiga ah ee guudmarka iyo warbixin-siinta sidan ayay u eg yihiin:

- Sanadkiiba (caadiyan), guudmar ku samee Heykalka iyo Siyaasadda Maareynta Khatarta ee ururkaaga, halbeegga qiimeynta khatarta iyo Hannaanka Maareynta Khatarta iyo sida uu u waafaqsan yahay hannaanka ururkaaga.
- Bishiiba ama saddexdii biloodba mar (ama hadba kal-fadhiga Guddigu waxa uu yahay) Guddiga warbixin cusub ka sii Diiwaanka Khatarta iyo qorshooyinka la tacaalidda khatarta (gaar ahaan kuwa 'daran' iyo 'khataraha aadka u sarreeya').
- Bishiiba mar (ama hadba waxa uu kal-fadhiga maamulka sare ama shaqaalahu yahay), guudmar ku samee khataraha iyo qorshooyinka la tacaalidda khataraha.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Lifaaqa A – Tusaalaha Siyaasadda Maareynta Khatarta

Guudmar

(Magaca NGO-ga) wuxuu garowsan yahay in ururku u nugul yahay khataro gaar ah iyada oo la eegayo abuurta shaqooyinkiisa iyo deegaanka uu ka shaqeeyo. Sirta guusha (Magaca NGO-ga) waa wax ku oolnimada maareynta khatarta si uu u damaanad qaado xaqiijinta ujeeddooyinka urureed.

Khataruhu waxay ka imaanayaan qabashada shaqooyinka ururka iyo ilo kale oo dibadeed. Khataruhu waxay u dhacaan habab kala geddisan waxayna saameyn ku yeelan karaan waxqabadka dhaqaale, sumcad, caafimaad iyo nabadgelyo, bulshada iyo waxqabadka guud ee ururka.

Siyaasad

Si khataraha noocaas ah si waafi ah loogu fahmo, (Magaca NGO-ga) wuxuu aasaasay Siyaasadda Maareynta Khatarta taas oo heykalka siineysa sidii khatarta loogu maareyn lahaa hab waafaqsan ururka. Siyaasadda Maareynta Khatarta waxaa lagu dhisay ISO 31000:2009 Risk management (Maareynta Khatarta ee Ururka Caalamiga ah ee Jaangoynta) – Mabaadii'da iyo tilmaamahaasina waxay qeyb ka yihiin heykalka maamul wanaagga ururka. Siyaasaddu waxay la tacaaleysaa khataraha istiraatiijiyeed iyo kuwo howleed.

Waxaan adeegsan doonnaa xirfadaheenna iyo khibradaheenna si aan u aqoonsanno dhamaan khataraha ka jiri kara ururka dhexdiisa. (Magaca NGO-ga wuxuu kaloo xaddidi doonaa tallaabooyinka howleed ee khatarta lagu maareeyo.

Waxaan qiimeyn doonnaa xaddiga ama heerka khatarta innaga oo xisaabta ku darsaneyna saameynta ay ku yeelan karto howlaheenna. Khataraha waxaa loo kala heereyn doonaa hab guud iyo hab joogta ah Diiwaanka Khatartana wuxuu ka koobnaan doonaa khataraha ururku waajahay.

Khataraha aan ururku aqbali karin waxaa loo abuuri doona qorshooyin iyo tallaabooyin lagula tacaalo. Khataraha iyo hababka maareynta khataraha si joogta ah ayaa loo kormeeri doonaa dhinacyada ururka daneeya ayaana lagala tashan doonaa oo laga wargelin doonaa hababka aan khataraha u maareyno.

Xammilitaanka Khatar

Xammilitaanka aan u heyno khataraha xun waxaa loo adeegsan doonaa in lagu xaddido khatartee ay tahay in lagula tacaalo iyadoo la adeegsanayo abuuritaanka tallaabooyinka maareynta khatarta si khatarta loola tacaalo ilaa heer la aqbali karo. Inta lagu gudojiro hannaankan waxaan tixgelin doonnaa tallaabooyin halbeegyo dheeri ah leh si khatarta loola tacaalo heer la aqbali karo.

Isdhexgalka Maamul Wanaagga & Qorsheynta Istiraatiijiyeed

Siyaasadda Maareynta Khatartu waxay qeyb ka tahay heykalka maamul wanaagga waxayna isdhexgal la sameyneysaa hannaanka qorsheynta istiraatiijiyeed. Siyaasaddu waxay la tacaaleysaa khataraha howleed iyo kuwo istiraatiijiyeed iyo shuruudda laga rabo ururka si uu uga shaqeeyo deegaanka ku hareereysan.

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.

Isla-xisaabtan

Tallaabooyinka maareynta khatarta iyo la tacaalidda khatarta waxaa loo xilsaari doonaa kaalimo shaqo oo ka mid ah shaqooyinka ururka. (Magaca NGO-ga) isla-xisaabtanka quseeya maareynta khatarta wuxuu ku daray shaqooyinka fulineed, maamul iyo kormeer kuwaas oo looga baahan yahay in si joogta ah looga warbixiyo arrimaha la xiriira khataraha iyo tallaabooyinka maareynta khatarta.

Kormeerka Maareynta Khatarta

Guddiga Khatarta iyo Hubinta ee (Magaca NGO-ga) (ama Guddiga caadiga ah ee ururka, haddii ururku aanu lahayn Guddiga Khatarta iyo Hubinta) wuxuu kormeeri doonaa Siyaasadda Maareynta Khatarta iyo u nuglaanshaha ururka ee khatarta. Kormeeridda wax ku oolnimada hannaankeenna maareynta khatarta iyo hawlaheenna wuxuu Guddiga iyo dhinacyada daneeya ururka siin doonaa dammaanad wuxuuna gacan ka geysan doonaa sidey nooga go'an tahay horumar ururеed oo joogta ah.

Warbixin-siin, Kormeer iyo Dib-u-eegis

(Magaca NGO-ga) wuxuu si joogta ah u kormeeri doonaa tallaabooyinka la tacaalidda khatarta. Nidaamka waxqabadka maareynta khatarta iyo tallaabooyinka maareynta khatarta ee heerka sare ah waxaa si joogta ah loogu wargelin doonaa Guddiga Khatarta iyo Hubinta (ama Guddiga caadiga ah ee ururka, haddii ururku aanu lahayn Guddiga Khatarta iyo Hubinta). Dib-u-eegis rasmi ah oo ku saabsan hannaanka maareynta khatarta iyo Diiwaanka Khatarta ayaa sannadkiiba mar la sameyn doonaa Guddiguna sannadkiiba mar ayuu wax ku oolnimada Siyaasadda Maareynta Khatarta qiimeyn doonaa.

Xiriir iyo Wadatashi

(Magaca NGO-ga) wuxuu la xiriiri doonaa kalana tashan doonaa dhinacyadiisa daneeya (ee gudo iyo dibad leh) habka uu khatarta u maareynayo.

(Magac)

Agaasimaha Guud/ Madaxa/ Maareeye/Maamule

(Taariikhda la qoray)

(taariikhda dib loo eegay)

Dukumiintigani waxaa uu bixiyaa hagid keliya. NGO'yada waa inay waafajiyaan baahiyaha gaarka ah ee ururka.